

JAMHURIYADDA



SOMALILAND



FAAFINTA RASMIIGA AH

SOMALILAND REPUBLIC
OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

XAFIISKA GARYAQANKA GUUD EE QARANKA
JSL, HARGEYSA

E-mail: Garyaqankaquud@gmail.com

Sanadka: Saad	Cadadka: 1aad ee January	Taariikh: 06/02/2016
---------------	--------------------------	----------------------

QIIMAH CADADKA: SL. Sh.

RUKUNKA (Subscription):

QIIMAH FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad:
Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.

TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA

BAARLAMAANKA IYO XEER

NIDAAMIYAYAASHA:

- 1) Xeerka Ilaalinta Kaymaha Iyo Duur
Joogta, Xeer Lr. 69/2015

4

QAYBTA LABAAD: XEER

NIDAAMIYAYAASHA IYO

DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

- | | |
|---|----|
| 2) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0572/012016</u> | 45 |
| Magacaabid | |
| 3) <u>XEER MADAXWEYNE_Xil-ka Qaadis</u> | 46 |
| 4) <u>XEER MADAXWEYNE_Beddel</u> | 47 |
| 5) <u>XEER MADAXWEYNE Lr: 0573/012016</u> | 48 |
| Magacaabid | |
| 6) <u>XEER MADAXWEYNE_Beddel</u> | 49 |

- 7) **XEER MADAXWEYNE** Lr: 0574/012016
Magacaabid

50



QAYBTA SADEXAAD:

DIGREETOYINKA,

WAREEGTOYINKA, AMARADA &

XEER NIDAAMIYAYAASHA

WASIIRADA, IWM

- 8) Xeer Nidaamiyaha Dhaqangelinta
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer Lr.
01/2015
GUDDIDA DOORASHOOYINKA QARANKA
- 9) Xeerka Hab-Dhaqanka Axsaabta Qaranka ee
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha,
GUDDIDA DOORASHOOYINKA QARANKA

52

99

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

- 10) Amar Xayiraad 4 Guri oo Dhaxal ah
Maxkamada Degmadda, Hargeysa 114
- 11) Baafin dacwaysane C/qani sayid
C/raxmaan
Maxkamada Degmadda, Hargeysa 116
- 12) Baafin dacwaysane Maxamed Axmed Hawo
Maxkamada Degmadda, Hargeysa 117
- 13) Wareegto Garsoor oo ku saabsan
Dacwadaha idaariga ah
Maxkamada Sare 118
- 14) Diiwaan Gelin Shirikada Gulf Pharma
Limited Company LTD
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 120
- 15) Diiwaan Gelin Shirikada Isom Travel and
Logistic
Xafiiska Xeer illaalinta Guud 121
- 16) Diiwaan Gelin Shirikada Budul

<p>Construction Comapny <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>17) Diiwaan Gelin Daabacaada Buugaanta Primary and Secondary textbooks <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>18) Diiwaan Gelin Shirikada KK Trading Company & Costruction LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>19) Diiwaan Gelin Shirikada Fanoon Star General Construction Company <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>20) Diiwaan Gelin Shirikada Waafi Construction & Consulting LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>21) Diiwaan Gelin Shirikada Caydiid Construction & Contracting Company LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>22) Diiwaan Gelin Shirikada Kobciye Construction Comapany <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>23) Diiwaan Gelin Shirikada Lusidle Shipping LTD <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p> <p>24) Diiwaan Gelin Shirikada Cosob Construction Co <u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u></p>	 <p>123 124 125 127 128 130 131 133 134</p>
---	--

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

Sooma bixin

QAYBTA KOWAAD:
XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:



REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/240-3775/012016

DATE10/01/16

XEER MADAXWEYN Lr:0583/012016

**Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo
Duur Joogta Xeer Lr. 69/2015**

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr. GW/G/KF-29/673/2015 ee ku taariikheysan 21/12/2015 ee ay ku ansixiyeen Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur Joogta JSL Xeer Lr.69/2015.

Wuxuu Soo Saaray

Xeerkana oo lagu baahinayo Dhaqan-galka Xeerka Ilaalinta Kaymaha Iyo Duur Joogta ee Jamhuuriyadda Somaliland Xeer Lr. 69/2015.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



The Republic of Somaliland
House of Representatives
Head Quarter Hargeisa.



Jamhuuriyadda Somaliland
Golaha Wakiilada
Xarunta Hargeysa.

Ref. GU/G/KT-29/673/2015

Date 21/12/2015

Go'aanka Ansixinta Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur-Joogta

Xeer Lr. 69/2015

MARKUU ARKAY:-

Qodobka 18^{aad} ee Dastuurka oo waajibiyay in dawladdu mudnaanta koowaad siiso daryelka iyo ilaalinta degaanka, kana diyaar garawdo sida looga hortagayo aafsooyinka dabiiciga ah ee ka yimaada baabiinta degaanka.

MARKUU ARKAY:-

Qodobka 12^{aad} faqradda 4^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo tilmaamaya in dawlada dhexe masuul ka tahay ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, kuna waajibiyay in ay qaado talaabo kasta oo haboon si looga faa'idysto kheyraadkaas.

MARKUU ARKAY:-

Xeerka ka hortagga Xaalufka iyo Nabaad Guurka (**Xeer No. 04/98**) iyo siyaasadda Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ee ku aadan daryelka iyo ilaalinta degaanka.

MARKUU YAQINSADAY:-

Duruufaha qalafsan ee uu ku suganyahay degaanka Somaliland iyo baahida loo qabo in la ilaliyo oo la soo celiyo degaanka.

MARKUU OGAADEY:-

Hoos u dhaca ku yimiid duur-joogtii wadanka iyo gabboodkoodii oo la baabiliyay.

MARKUU KA DHEREGSANAADEY:-

DABAR-GO iyo hoos u dhaca ku yimid dhirtii wadanka taas oo sababtay caro guur.

MARKUU KU RAACEY:-

Wax ka badalkii iyo soo jeedimihii Golaha Guurtidu ku sameyay mashruuc sharciga Xeerkan.

MARKUU U CODEYAY:-

Ansixinta Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duu-Joogta Kal-fadhiga **29nd Fadhlighisi 8nd** taariikhduuna aheyd **07/12/2015** oo ay goob joog ahaayeen **(42)** Mudane oo ka mida ah mudanayaasha Golaha Wakiilada

WUXUU

Halkan kuugu soo gudbinayaa Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duur-Joogta **Xeer Lr. 69/2015S**

ALLAA MAHAD LEH

C/risaaq Siciid Ayaanle
Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JS

Baashe Maxamed Faafax
Guud Ku-xigeenkha ^{1st} ee Golaha Wakiilada JSL

Golaha Wakiilada JSL



MARKUU ARKAY: - Qodobka 18aad ee Dastuurka oo waajibiyay in dawladdu mudnaanta koowaad siiso daryeelka iyo ilaalinta degaanka, kana diyaar garawdo sida sooga hortagayo aafaooyinka dabiiciga ah ee ka yimaada baabi'inta deegaanka.

MARKUU ARKAY: - Qodobka 12aad faqradda 4aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland oo tilmaamaya in dawlada dhewe masuul ka tahay ilaalinta kheyraadka dabiiciga ah, kuna waajibiyay in ay qaado talaabo kasta oo haboon si looga faa'idaysto kheyraadkaas.

MARKUU ARKAY: - Xeerka ka hortagga Xaalufka iyo Nabaad Guurka (Xeer No. 04/98) iyo siyaasadda Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga eek u aadan daryeelka iyo Ilaalinta deegaanka.

MARKUU YAQIINSADAY: - Duruufaha qalafsan ee uu ku sugyhay deegaanka Somaliland iyo baahida loo qabo in la ilaadio oo la soo celiyo deegaanka.

MARKUU OGAADEY: - Hoos u dhaca ku yimi duur-joogtii wadanka iyo gabboodkoodii oo la baabiiyay.

MARKUU KA DHEREGSANAADEY: - DABAR-GO iyo hoos u dhaca ku yimid dhirtii wadanka taas oo sababtay caro guur.

MARKUU U CODEEYAY: - Wax ka badalkii iyo soo jeedimihii Golaha Gurutida ku sameyay mashruuc sharciga Xeerkan.

WUXUU SOO SAARAY XEERKAN

XEERKA ILAALINTA KAYMAHA IYO DUURJOOGTA
SOMALILAND (Xeer Lr. 69/2015)

CUTUBKA 1AAD

QODOBO GUUD

Qodobka 1aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa “ Xeerka Ilaalinta Kaymaha iyo Duurjoogta” (Xeer Lr.69/2015)

Qodobka 2aad

Eray bixinta

Si loo fahmo macanaha guud ee xeerkan, ereyada soo socda waxay yeelanayaan fasiraad ku hor qoran:-

Duur -joog: waxaa loola jeedaa xayawaan kasta oo laf dhabar leh, ama bilaa laf-dhabar ah

waxaana ku jira ugxanta iyo dhashooda,
waxa ka baxsan bini'aadamka, xoolaha la
dhaqdo iyo kaluunka




Sarkaalka awooda u leh: waxa loola jeeda masuul kastoo ay wasaaradda deegaanka iyo horumarinta reer miyiga u igmatay ilaalinta deegaanka ilaalinta deegaanka, qof kasta oo ka tirsan Ciidanka Booliska , ciidanka ilaalada deegaanka , ilaalada badbaadinta deegaanka , seero ilaaliye, ilaadada iyagu is xilqaamay, iyo xil saartay meel marinta xeerkan

Waddo cad/waddo dhab ah: waxaa loola jeeda wado si cad u tilmaaman oo bulshadu isticmaasho


Carbonfuran: waxaa loola jeedaa cayayaan dile halis ah oo sumeeya silsilada cuntada, waxaanu dili karaa shimbiraha waa weyn sida gorgorka, todobaddii noocba shan ayaa wadankeena ka dabar go'ay.

DDT: waxaa loola jeeda sun cayayaan dile ah oo unugyada noolaha gasha oo sababi karta cudurka Kansarka, waxayna saameyn ba'an gaashiisaa DNA -da noolaha oo dhan.



- Qabasho:** waxaa loola jeeda fical kasta oo si toos ah loogu qabanayo xayawaan, cuf, ugxaan iyo dhasha xayawaanka.
- Dhuxul:** waxaa loola jeedaa dhuxusha madaw ee ka soo hadha geedo la shiday
- Xili xidhan /xili xidhka:** waxaa loola jeeda xili lagu nasinayo, laguna dhawrayo isticmaalka deegaan cayiman.
- Ka ganacsiga:** waxa loola jeedaa fical kasta oo waxa lagu kala badalanayo, lagu kala iibsanayo, si faa'iido looga helo Wuxaan ku jirin isticmaalka shaqsi ahaaneed (personal purposes).
- Dugaagga halista:** waxaa loola jeeda bahalaha nafta dadka halis ku ah.
- Sarkaalka kaymaha:** waxaa loola jeedaa masuul ka sareeya ilaalada kaymaha oo ka tirsan Waaxda Kaymaha ee Wasaarada Deeganka iyo Horumarinta Reer Miyiga.
- Xaaboo :** waxaa loola jeeda laamaha iyo jirdaha qalalay ee la shito,
- Hawl galqa kaymaha :** waxaa loo jeedaa hawl kasta oo ay fulinayso Waaxda Kaymah ee Wasaaradda ama Wakiilka waaxda si loo horumariyo oo loo hagaajiyo kaymaha.

Khayraadka dhirta/kaymaha ka soo go'da: waxaa loola jeedaa qolofta geedaha, calafka (cawska), malmalka, fooxa, xabagta, xabagta shinida, alwaaxa, xaabada, iyo wax alla wixii ay Wasaaraddu shaaciso in ay yihiin kheyraadka dhirta.



Keyn seero ah: waxaa loola jeedaa dhul dhireed si ku meel gaadha ah ka xanniban isticamaalka dadka iyo xoolaha.

Xayawaanka la ugaadhasado: waxa loola jeeda duurjoogta la qabsan karo, ama la dili karo si loo cuno ama loo rabbaysato oo ay ku jiraan, dhashooda iyo ugxaantoodu.

Seero /dhulxidha: waxaa loo jeeda dhul muddo cayman loo xayiray /quodeeyay /daryeelka dhirta iyo xayawaanka.

Sarkaal sare oo seero ilaaliye ah: waxaa loo jeedaa saraakiisha ay Wasaaraddu magcawdo si ay u laaliyaan seerayaasha.

Ruqsad : waxa loola jeedaa ogolaansho rasmi ah oo ay bixiso Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga .

Gaadhiid mashiin ku socoda: waxaa loola jeeda noocyada gawaadhidha, gaadiidka bada, gaadiidka circa ee ku socda /ku shaqeeya shidaalka.

Dhul gaar ah: waxaa loola jeeda dhul lahaanshihiisa loo aqoonsan yahay cid gaar ah, isticmaalkiisa iyo intifaacisaba.

Hoy: waxaa loola jeedaa nooc kasta oo hay dad ay ku noolyihii ah, intuu doona ha leekaado ama nooci doona ha noqdee

Waddo: waxa loola jeedaa dhabbo ama jid ay dadwynuhu isticmaalaan oo ay ku jiraan biriishyadu (bridges).

Duggaag: waxa loola jeedaa xayawaanka /bahalaha fafka iyo xoolaha cuna.

Sarkaal sare oo ilaalada kaymaha ah: waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan Ilaalada Deegaanka oo ka sareeya darajada kormeere.

Degaan: waxaa loola jeedaa goob si joogto ah dad ugu neg yihiin.

Alwaaxda geedaha laga sameeyo: waxaa loola jeedaa geed dhacay ama la

jaray oo la qaabeeyay si
looga dhigo alwaax.

Geed:

waxaa loola jeeda mid ka mid
dhirta noocyadooda kale
duwan sida dhirta dhaadheer,
kuwa gaagaan, kaymaha,
geedka timirta ama saliida iyo
wixii la mid ah.

Duur-joog:

waxaa loola jeeda nooc kasta oo
xayawaan ah, shimbiraha, kaluunka
wabiga, xamaaratada, oo aanay ku
jirin noolaha yar yar ee dhulka.

Ugaadhsi:

waxa loola jeedaa qabsashada,
waxyeelleynta iyo dilidda duurjoogta.

Wasiir ama wasaarad:

waxaa loola jeedaa
Wasiirka/Wasaaradda
Deegaanka iyo Horumarinta
Reer Miyiga

Xeer- nidaamiye:

Waa hab-raac xeerkan ka
dheegmaya oo digreeto ku soo
saarayo wasiirka wasaaradda
Deegaanku:

Cutubka 2aad

Maamulka

Qodobka 3aad


Hawlaha wasaaradda

Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga
ayaa masuul ka ah hirgalinta xeerkan.

Wasaaradu waa in ay:

1. Kormeer iyo tirakoob ku samayso khayraadka dhirta iyo duurjoogta.
2. Waa in ay daraasad cilmi baadhisa ah ku samaysaa khayraadka dabiiciga ee dalka saddexdii sano hal mar iyadoo qoraal (report) ka diyaarinaysa. Qoraalka daraasada laga sameeyay iyo wixii ka soo baxa waa in ay baahiso wasaaraddu.
3. Waa in kor loo qaad aqoonta shaqalahi iyo dadka kale ee u qaabilsan ama ku hawlan ilaalinta kaymaha iyo duurjoogta si ay hawlahaaas ugu gutaan si hufan sida ku qeexan xeerkan.
4. Waa in ay abaabushaa obole heer qaran ah oo ay ka qayb galayaan bulshada qaybaheeda kala duwan.
5. Waa in ay samaysaa barnaamijyo (mashaariic) ku saabsan dhiraynta oo ay ka qayb galayaan shakhsiyaad, bulsho waynata iyo ururadda danaynaya in ay beeraan geedo iyo caws.
6. Waa in ay warbixisaa dhirta ama duurjoogta darbar go'aysa, iyadoo wasaaraddu samaynaysa barnaamijyo iyo dadaalo lagu daryeelo.
7. Abuurtaa oo ay maaraysaa Seerooyinka.
8. Kor u qaadaa abuurista iyo maareynta kaymaha gaarka ah iyo kuwo bulshada.
9. Bixisaa ruqsaddo si loo maamulo khayraadka dhirta si waafaqsan xeerka.
10. Masuul ka noqotaa cilmi baadhista ku saabsan wixii badeli lahaa tamarta imika la isticmaalo oo aan deegaanka wax u dhimayn.
11. Abuurtaa tamarta laga badalayodhuxusha dhirta.
12. Abuurtaa ciidanka ilaalada kaymaha iyo Duurjoogta si ay u dhaqangaliyaan (socodsyaan) xeerkan.

13. Iskaashi la samaysaa wasaaraddaha kale, ururadda aan dawliga ahayn (NGO's) iyo ciddii kale ee danaynaysa si kor loogu qaado aqoonta iyo qalabaynta ilaalida deegaanka iyo duurijoogta.



Qodobka Afraad

Gudiyada Ilalinta Deegaanka Heer Qaran, Gobol, Degmo iyo Tuulo

- 1- Wasaaradda Deegaanku iyadoo la tashanaysa Gudiyada Khayraadka Dabiiciga ee Golaha Wakiilada, Golaha Guurtida iyo ururada rayidka ah ee ku hawlan arrimaha deegaanka waxay abuuraysaa Guddiga Ilalinta Deegaanka ee Heer Qaran (GIDHQ)
- 2- Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa Maamulada goboladu, la tashanaysa ururadda rayidka ah, iyo waayeelka bulshada ee heer gobol waxay abuuraysaa Guddiga Ilalada Deegaanka Ee Heer Gobol. (GIDHG).
- 3- Wasaaraddu iyadoo la kaashanaysa Golayaasha Deegaanka Maamulka Degmooyinka) iyagoo la tashanaya ururadda rayidka ah iyo waayeelka bulshada waxay dhisayaan Guddiga Ilalinta Deegaanka ee Heer Degmo (GIHD).
- 4- Wasaaraddu iyadoo kaashanaysa xildhibaanada golayaasha deegaan wax garadka waxay dhisaysa Guiddida Deegaanka ee heer Tuulo.
- 5- Xubnaha gudiyadu waxa ay ka koobnaanayaan rag iyo dumar (Lab iyo Dhedig).
- 6- Xubnuhu waa in ay yihiin muwaadiniin magac ku leh bulshada dhexdhedaada deegaankana ka war haya.

7- Muddo xileedka Gudiyaddu waa shan sano, mar labaadna waa la magcaabayi.

Qodobka 5aad

Dhismaha iyo Hawlaha Gudiyadda

- 
1. Guddida Heer Qaran waxay ka kobantahay 10
 - b) Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer miyiga 2 Xubnood .
 - t) Guddiga Khayraadka Dabiiciga ee Golaha Wakiilada Xubin
 - j) Guddiga Khayraadka dabiiciga ee Golaha Guurtida Xubin
 - x) Wasaarada Xannanada Xoolaha Xubin
 - kh) Wasaarada Beeraha Xubin
 - d) Wasaarada Biyaha Xubin
 - r) Wasaaradda Tamarta & Macdanta Xubin
 - s) Wasaarada Kallumaysiga iyo Xubin
 - sh) Wasaarada Wershadaha Xubin.
 - Dh) Wasaarada Arrimaha Gudaha Xubin
2. Wasiirka Wasaarada Deegaanku iyo Horumarinta Reer Miyiga ayaa noqonaya Guddomiyaha Gudidda Deegaanka Heer Qaran.
 3. Xubnaha waxaa soo magcaabaya Masuulka Ugu Sareeya Hay'adda xubin kasta oo ay ka socoto.
 4. Wasaaradda D&HR waxay hawlgelinaysaa Guddiga Deegaanka ee Heer Qaran waxay ay kala talinaysa

wasaaradda arrimaha la xidhiidha Dhaqan galinta xeerkan iyo arrimaha kale ee ay wasaaraddu ka dalbato in lagala taliyo ee ay aqoonta u leeyihiin.

5. Isu duwaha WD&HR wuxuu hawlgelinayaan Guddiyada Heer gobo lee degaanka, guddidu waxa ay si dhaw ula shaqaynaysaa maamulka gobolada, Hay'adaha sharci fulinta (law enforcement authorities) waxayna si nabab gelya ah u joojinayaan ficiilada sharci darada ah ee lagula kaco deegaanka, iyagoo u gudbinaya maamulka gobolka.
6. Wakiilada WD&HR ee heer degmo waxay shaqo gelinayaan guddiyada Deegaanka ee heer degmo waxa ay si dhaw ula shaqaynayaan golayaasha degaanka (maamulka Degmooyinka), hay'adaha sharci fulinta, Booliska iyo hay'adaha kale ee amniga.
7. Isuduwayaasha gobolada/wakiilada heer degmo ee wasaaradda Deegaanka iyo horumarinta reer miyiga waxay hawlgelinayaan guddiyada heer Tuulo waxa ay si dhaw ula shaqaynayaan maamulka tuuloooyinka, hay'adaha sharci fulintas iyo bulshada reer miyiga.

Qodobka 6^{aad}

Shirarka (Fadhiyada) Gudiyadda

1. Fadhiyada Gudiyadda waxaa isugu yeedhaya oo Guddoominaya Masuulka u sareeya ee WD&HR ee qaran, gobol, deegaan ama cidda uu u igmado.
2. Guddi kasta waxaa shirinaya masuulka ugu sareeya WD&HR ee heer qaran, gobol, degmo iyo tuulo ugu yaraan saddexdii biloodba hal mar (once every quarter).
3. Gudiyadda waa in ay samaystaan nidaam (Hannaan) iyo xeer hoosaadyo.

CUTUBKA 3AAD

ILAALINTA KAYMAHA, DHIRTA IYO DHULKA DAAQA

Qodobka 7aad



Ilaalinta iyo isticmaalka Dhirta iyo Dhul Daaqsimeedka

1. Lama goyn karo, gubi karo ama xididada looma saari karo si khaldan looma isticmaali karo dhirta Soomaaliland.
2. Waa mamnuuc in dhirta noocyadeeda kala duwan sida geedaha iyo cawska la baabiiyo iyadoo la goynayo si looga baayacmushtaro.
3. Waxaa la ogol yahay in dhirta, wax ka baxa dhirta, cawska iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah looga faa'iidaysto si waafaqsan xeerkan oo aan waxba u dhimayn nolosha dhirta.

Qodobka 8aad

Dhul Oodan

1. Waxa reeban in si gaar ah loo oodo dhul-daaqsimeed.
2. Looma bixin karo Ruqsad ogolaanshiyo ah oodashada dhul-daaqsimeedka.
3. Waxa reeban in si gaar ahaaneed loo oodto dhul-daaqsimeedka, dhulka kaymaha, soolkha ah, qadawga, dhul cawseedka (banaanka), buuraha iyo sanaagoodka.
4. Waa in labadii oodood ba oo isku xigaba uu u dhexeeyo dhul cabirkiisu gaadhayo laba boqol oo mitir si uu u fududaado dhaqdhaqaqa dadka iyo xoolahu sida ku xusan Qodobkan faqradiisa 1aad.

- 
5. Wasaaraddu waa in ay la socotaa ama dabaggashaa sahaminta dhulka ee ay la waddo wasaaradda beeraha.
 6. WD&HR iyadoo la tashanaysa guddiyada deegaanka maamulada gobolada, degmooyinka iyo tuulooyinka waxay baabiinaysaa dhulka sida sharci darada ah loo ootay, kaas oo aan waafaqsanayn qodobkan faqradiisa 1^{aad}.
 7. Lama Samayn (abuuri) karo aagag deegaan (settlements) ama tuulooyin aan waafaqsanayn siyaasadda guud ee dhulka Somaliland.
 8. WD&HR iyadoo la hawlgalinayo, guddiyadda heer gobol, iyo degmo, waxay ay ogolaansho u bixin karaan dhulka ku haboon in degaan ama meel biyood la dhigi karo iyada oo loo eegaysa siyaasada & xeerarka dalka ee isticmaalka dhulka.

CUTUBKA 4AAD

KAYMAHA GAARKA AH IYO KUWA BULSHADA

Qodobka 9^{aad}

Dhir La Beeray

Qof kasta oo dhul sharci ah leh eek a beera dhir waxa uu leeyahay wixii dheef ah ee dhirta dhulkaasi ka soo baxda waxa uu dhirtaasi u isticmaali karaa sida uu doono.

Qodobka 10^{aad}

Abuurida iyo Maaraynta Kaymo Gaar ah iyo Kuwo Guudba

1. Haddii loo arko inay haboontahay abuurida meel lagu kobciyo dhirta si loo horumariyo beerida dhirta ,maareynta kheyraadka , ka hortaga caro guurka

,iyadoon dhibaato loo gaysanayn, Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga waxa ay heshiisyo la galaysaa:-

B) Bulsho ama bulshooyin sharci u haysta isticmaalka dhul si loo sameeyo oo loo maareeyo kaymaha guud.

T) Qof ama dad badan oo sharci u haysta isticmaalka dhul si loo sameeyo oo loo maareeyo kaymaha gaarka ah.

2. Heshiisyadda la galo si waafaqsan qodobkan faqradiisa 1aad xarafka (B) & (T) waa in ay:-

- i. Qeexaan xuduudaha kaynta.
- ii. Wakhtiga uu heshiisku shaqaynayo iyo shuruudaha heshiisku ku buri karo.
- iii. Qorshe ay ku qoranyihin hawlahaa ay tahay in uu qabto qofka ama bulshada heshiiska lala galayo si loo maareeyo kaymaha.
- iv. Waajibaadyada nkale ee qofka ama xubanaha bulshada.

3. Heshiiska galitaankiisu waxa uu dhalinaya in dadka bulshada kawada tirsani ay wada yeelan doonaan dhirta sida dabiiciga uga soo baxa dhulkaasi.

4. Jaritaanka (goynta) dhirta ka baxa kaymaha qodobkan ku xusan looma baahna ruqsad ee waxa loo baahanyahay in lala tashado wasaaradda

5. Ilaalada waxa looga yeedhayaa Ilaalada Deegaanka oo waxay kale yihiin ilaalo, ciidanka badbaadada ama ilaalada deegaanka.

6. Ilaalada Deegaanku waa in ay xidhaan dirays gooni ah oo astaan la aqoonsan karo ay ku qoran tahay (ku dhajisantahay).

Qodobka 11aad

Soo Bandhigida iyo Samaynta ilo Tamareedyo Lagu Bedalo Kuwa Haatan jira.



1. Si loo xakameeyo dabar go'a dhirta Somaliland, Wasaaraddu waa in ay daraasadayso sidii loo heli lahaa Tamar la aqoodi karo oo aan deegaanka wax u dhimayn si looga maarmo (loogu badalo) dhuxusha.
2. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu waa in ay u soo bandhigtaa dadweynaha tamarta lagu badalayo dhuxusha, waana in dhuxusha laga mamnuuca **marka tamartaasi la helo.**
3. Wasaaradu waa in ay burisaa (kala noqotaa) ruqsaddaha dhuxusha ee ay horey u bixisay Sanad gudhiis oo ka bilaabmaya maalinta xeerkan la ansixiyo.
4. Wasaaraddu waa in ay hogaamisaa wacyi galin qaran iyadoo dadweynaha lagu wacyi galinayo baaba'a ku yimid dhirta wadanka.
5. Goobaha ganacsiga waa in ay wasaaraddu ku qasabtaa in ay dhuxusha ku badalaan tamarta aan dhuxusha ahayn.
6. Waa in gaaska iyo qalabka kale ee la xidhiidha loo sameeyaa cashuur dhaaf 100%.
7. Xeerkani waxa uu mamnuucayaan u iib geynta dhuxudha meelo ka baxsan xuduudaha Somaliland dhoofinta dhuxusha.
8. Dawladu waa in ay abuurtaa sanduuq dhaqaale oo wax lagaga qabanayo hormarinta deeganka iyo la dagaalanka xaalufka marka xeerkan la ansixiyo.

CUTUBKA 5AAD

SEERAYAASHA

Qodobka 12aad



Seerayaasha

1. Wasaaraddu waa in ay Sanad gudihiis ku qiimaysaa darajada seerayaasha Somaliland.
2. Wasaaradu waa in ay la soo wareegto wixii seerayaal dawladeed ahaan jirtay gacanta dawladana dib ugu soo celisaa.
3. Wixii seere ah maamulkiiisa wax iska leh Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer Miiga

Qodobka 13aad

Abuurida Seerayaal Cusub

1. Madaxweynaha Somaliland ayaa shaacinaya (ku dhaqaaqaya) maqaamka/ darajada Seerayaasha, qiimeynata wasaaradda ka dib.
2. Seerayaasha la shaaciay waa in sanad gudihiis oo ka bilaabmaysa markii la shaaciay, xuduudo muuqda loo sameeyaa.
3. Dadka goobahaas deggan ee xuquuq isticmaal leh, waxaa la siinaya ruqsaddo si ay uga faa'iidaystaan dhaqaalo ahaan iyo bulsho ahaanba, waxaana mamnuuc ah waxyelida geedaha, dhirta iyo cawska.

Qodobka 14aad

Noocyadda Seerayaasha iyo Kala Xadayntooda

1. Iyadoo lala tashanayo dhamaan daneeyayaasha, seerayaasha dhulka Somaliland waxaa loo kala saarayaa (qaybinayaa) sida hoos ku qoran:
- b) Seero jooga ah (Permanent reserves) waa seero joogta ahaan u xidhan looguna talaagalay baadhistaa cilmiyeed iyo dhirayn (dib u beerid) geedo dabar go'aya.
- (t) Seero xilli (seasional reserves) – dhul la seeray wakhti dheer oo aan la furi Karin ilaa ay baahi culusi timaado ama abaaro daba dheeraaday.
- j) Seero abaareed (Drought reserves) – dhul la seeray wakhti dheer oo aan la furi Karin ilaa ay baahi culusi timaado ama abaaro daba dheeraaday.
- x) Seero talantaali (Rotational Reserves) – seero loo daaqo si talan taali ah oo xidhnaada muddo cayiman si uu dhulku u soo kabto.
- Kh) Seero Kaymeed (Forestry Reserves) – waa dhul xidhan oo loogu talo galay ilaalinta iyo qurxinta kaymaha dabiiciga ah sida kuwii hore u jirijiray oo ay ka mid ahaayeen Daallo, Gacanlibaax, Wagar, Libaaxlay, Nageeg IWM
2. Seerayaasha ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad waa in ay leeyihiin xuduudo la calaamadeeyey oo muuqda oo aan lagu xadgudbi Karin.
3. Xidhida iyo furidda seerayaasha aan joogtada ahayn waxaa maamulaysa sarkaalka Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga u jooga gobolka (isuduwaha wasaaradda ee degmada) isagoo la tashanaya Guddida Deegaanka ee heer degmo iyo Tuulo.

Qodobka 15aad

Maaraynta iyo Ilaalinta Seerayaasha

- 
1. Qof kasta oo :-
- (B) Gooya, rida, qaata, guba, dhaawaca, khayraadka dhirta si uu uga ganacsado gaar ahaan dhuxusha ama
 - (T) Urursada ama gooya cawska si uu uga ganacsado ama
 - (J) Xagaafa, qota, beer ahaan u isticmaala iyo wixii lamid ah ama
 - (X) Dhista, kuganacsada isaga oo aasaasaya tuuloojin ama meel la dago ama
 - (Kh) Ooda, ka qoda ceel biyood ama barkad ama
 - (D) Ka ugaadhsada, dabin u dhiga Duur-joogta ku nool seeraha ama
 - (R) Waxyeela, riixa, bedela, wareejiya, dhaqaajiya, faragalin ku sameeya caalamadaha seeraha ama
 - (SH) Ka sameeya wadooyin seeraha gudihiisa ama
 - (DH) Ka-ganacsada khayraadka dhirta.
2. Wuxuu mutaysanaya ciqaabta ama ganaaxa ku xusan Qodobka 28aad faqradiisa (1aad & 2aad) ee xeerkan.

Qodobka 16aad

Kala Xadaynta Dhulka Daaqa iyo Dhul-beereedka

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga iyadoo lala tashanayo Wasaaraddaha Xoolaha,

Macdanta , Biyaha iyo Beeraha si loo dhaqaaleeyo carrada iyo loona soo celiyo daaqii waa in ay kala xadaysaa dhul-beereedka, dhulka loo cayimay xoolo dhaqatada, dhulka loo isticmaalo biyo xidheenka, sida hoos ku qoran:-

B) Dhulka daaqa

T) Dhulka loo isticmaalo beerida geedaha xooluhu ku naaxaan (fodder production).

J) Dhulka beeraha

X) Dhulka loo isticmaal biyo xidheenka, ceelal, toggaga ee dhulka daaqista iyo waraabinta dhulka.

(KH) Dhulka loo cayimay xoolo dhaqatada

(D) Dhulka loo qoondeeyay biyo xidheenada (haraha iyo baliyada).

(R) Dhulka loo qoondeeyay Cilmi-baadhistaa dhirta iyo xayawaanka.

2. Wasaaraddu si ay u kontorooshaa Dhulka Daaqa, Kaymaha, Duurjoogta iyo khayraadka biyaha loogana faa'idaysto biyaha, waxay qaadeysaa talaabooyinka hoos ku qoran, iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Biyaha , Biyaha & Macdanta iyo Xanaadada Xoolaha:-

B) Ilaalinta qararka dooxyadda, jeexjeexa ah ee ka baxsan dhulka beeraha

T) Samayso mashaariic lagu joojinayo caro guurka

J) Horumarinta daaqa ku yaala dhulka Somalland, lana keeno baad cusub oo ku haboon dhulka.

X) Meel lagu kobciyo geedaha, dhirta,

KH) Dhiri galinta beeralayda isticmaaslka ijaarka nool si loo yareeyo khasaaraha xaalufinta dhirta iyo isticmaalka ooda.

R) Sahaminta dhirteena iyo ururinta geedaha nafaqada iyo dawada leh (Biomeicine)

S) Qaadista tiro koob xoolo dhaqato, xoolo u kala haboonista dhulka, xagga beeraha, daaqa dhirta, cilmi baadhista.

(SH) Dhiiri galinta iyo cilmi barista wixii bedeli lahaa dhuxusha (alternative energy).

Qodobka 17aad

Abuurista Beero Hawlo Gaar ah

1. Wasaaraddu waan in ay dhiiri gelisaa abuurista beeraha u gaarka ah calafka xoolaha lagu naaxiyo (fodder crop production) iyo keydinta geedaha & cawaskooda oo gundhig u noqdaya baanka calafka (fodder Bank) in lagu sameeyo meelaha kala ah:-
 - b) Dhulka loo qoondeeyay beeraha oo kaliya (crop production only).
 - t) Meel kasta oo dib loo soo celinayo loona barwaaqeynayo oo nabaad guurtay.
2. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyigu iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Xoolaha iyo Beeraha waxa ay amri kartaa:-
 - b) Meel lagu kobciyo geedaha (dhirta), meel loo tamashle (dalxiis) tago, oo aanay ku jirin meel macdan loo qoodeeyey ama dawladu hawl gaar ah u cayintey.

t) Meel la xidhey si o ohayo sideeda oo lagu dhaqaaleeyo dabciidda iyo cimilada, waxbarashana noqota (Biodiversity).

CUTUBKA 6AAD

DARYEELKA DUURJOOGTA

Qodobka 18aad

Ugaadhsiga

1. Ugaadhsigu waa ka mamnuuc Somaliland. Waxa mamnuuc ah qabashada, waxyeelleynta iyo dilida nooc kasta oo duurjoog ah, cidna ruqsad ugaadhsii lama siin karo.
2. Muwaadiniinta iyo Ajaanibta waxaa ka mamnuuc ah in ay ugaadhasadaan duurjoogta haddi ay tahay qabasho, toogasho, dabasho, ugxaan soo ururisi, lafo, maqaar, baadad iyo qayb kasta oo xawayanka duurjoogta ah.
3. Xeerkani waxa sidoo kale uu ciqaabayaa ama ganaxayaa dadka kala dilaala, kuwa ka ganacsada, rugaha ururiya ee soo bandhiga duurjoogta si ay macaash uga helaan.
4. Ajanibta doonaysa in ay booqdaan Somaliland ee ujeedadoodu tahay ugaadhsii, lama siinayo fasax dal ku gal (fiise), ruqsad ugaadhsii iyo ilaalo amni midnaba. Wasaaradda Deeganka iyo Horumarinta Miyigu waa in ay kala kaashataa arrintan Waaxda Socdaalka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
5. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Miyigu waa in ay abuurtaa ciidan ama ilaalada badbaadinta duurjogta oo dirays xidhan.
6. Muwaadinka ama muwaadiniinta ka war hela ugaadhsiga ka socda meel ka mid ah wadanka waa iney wargeliyaan xafiiska ugu dhow ee

Hay'adaha ku shaqada leh. Waa in si nabadgelyo ah ufarageliyaan oo ay u joojiyaan ugaadhsiga inta ay imanayaan fuliyayaasha sharcigu.

- 
7. Wasaaradda deegaanka iyo horumarinta reer miyigu waa in ay u xilsaartaa muwaadiniinta aqoonta u leh si ay unoqdaan ciidan ilaaliya duurjoogta gaar ahaan meelaha fog ee dalka.
 8. Madaxweynaha Somaliland oo kaliya ayaa hadyad ahaan ubixin kara ugu badnaan laba midh oo ah duurjoogta aan dabargo'ayn iyo kuwa dalkeena ugaarka ah (dalkeen kaliya).
 9. Goobaha iyo guryaha gaarka ah ee duurjoogta haystaa waxa ay dhiirigelinayaan inay dadka reer miyigu u soo ugaadhsadaan duurjoogta (Shinbiraha, Naasleyda iyo Noocyada kale ee duurjoogta). Xeerkani waxa uu mabnuucayaa in duurjoogta Huteelo ama Guryo gaar ah lagu hayo.
 10. Wasaaradu waa ay tirakoobtaa tirada duurjoogta ku nool Huteelada (Hotels) iyo Guryaha gaarka ah.
 11. Wasaaraddu waa in ay la wareegtaa lahaanshaha duurjoogta sida goonida loo haysto lakiin waxa ay joogayaan meeshooda ilaa inta loo sameenayo beer xayawaanka lagu daryeelo (Zoo) intaasna wax si joogta ah ula soconaya Wasaarada.
 12. Waa mamnuuc in duurjoog cusub la keeno (lagu bedelo kuwii hore) goobaha huteelada iyo guryaha gaarka ah.
 13. Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta reer miyigu waa in ay ku diyaarisaa beerta xanaanada iyo daryeelka duurjoogta la ururiyay (Zoo) iyo kuwa la qabto ee qaxoontiga ah (Wild life Refugee Camp) iyadoo la kashanaysa dawlada iyo hay'adaha caalamiga ah taas oo ay gacanta ku haynayso wasaaradu.

14. Waxa lagu dili karaa ogolaanshaha wasaarada deegaanka:-
- b. Haber-dugaaggu marka uu dadka iyo xoolaha halis galiyo ama cuno waa la dili karaa, waxaana sababta loo diley haber-dugaagaas iyo khasaaraha uu geystay lagu war-gelinayaan Gudida heer degmo.
 - t) Duur-joogta halista ku ah degaanka marka cilmi-baadhis lagu sameeyo, iyaga oo bata ama qaba cudurada la is-qaadsiyo.
 - j) Labka ama dhadiga gabooba marka tiro-koob lagu sameeyo sanad ilaa laba sano kasta si aanay daaqa iyo biyaha ugu cidhiidhyin kuwa tarmaya.
15. Wasaaradu waa in ay masuul ka noqotaa duurjoogta halista ah sida libaaxyada lagu hayo goobaha gaarka ah si bulshada looga badbaadiyo. Goobaha lagu hayo duurjoogtan halista ah waa in ay wasaaradu ku qanacdaa amnigooda ilaa inta la sameenayo beer duurjoogta lagu daryeelo (Zoo).

Qodobka 19aad

Dhoofinta iyo Soo dejinta Duurjoogta

1. Duurjoog aan wadanka laga aqoon (alien species) lama soo dajin karo.
2. Lama Dhoofinkaro nooc kasta oo kamida duurjoogta wadankeena (Native species).
3. Waxa reeban in la keeno dalka dhir wax yeelo u leh deegaanka iyo noolayaasha kaleba. (Invastive species).

Qodobka 20aad

Sameyntha Xarumo Cilmi Baadhiseed iyo Tarmin

1. Wassarada D&HR waxaa waajib ku ah in ay sameyso xarumo lagu tarminayo noocyada duurjoogta sida duurjoogta sida shimbiraha IWM si looga badbaadiyo dabargo ku imaada.
2. Noocyada sida gaarka ah ugu baahan in loo sameeyo tarmin si dagdag waxa kamida Goroyada, juglayga, Gunburiga libaaxa IWM
3. Sameyn ta xarumaha **tarminta & Cilmi-baadhistaa** waa in ay gacanta ku hayso wasaarada deegaanka iyo horumarinta reer miyiga isla markaana ay ahaataa bee'ad ku haboon noocyada la rabo in la badiyo, qorshayaasha **maarayneed ee xarumahaas waxa lagu fuliyaa si waafaqsan qodobka 18aad ee xeerkhan.**

CUTUBKA 7AAD

BIXINTA RUQSADAHA

Qodobka 21aad

Reebanaanta iyo bixinta ruqsadaha duurjoogta, Haber-dugaaga, Shimbiraha, Xamaaratooyinka

1. Waa reeban (mamnuuc) tahay ugaadhsiga, ka ganaciga, dhoofinta duurjoogta, habar-dugaagta, Shimbiraha, xamaaratooyinka ku nool, (ku dhaqan) Somaliland.
2. Waa reeban (mamnuuc) tahay bixinta ruqsad lagu oggolaanayo ugaadhsiga, ka ganacsiga, dhoofinta duurjoogta, habar-dugaagga, Shimraha, xamaaratooyinka dalka ku nool (dhaqan).
3. Madaxweynaha cid aan ahayni hadiyad uma bixin karto, cid kalena hadiyad uma siin karto, duurjoogta, habar-dugaagga, shimbiraha iyo xamaaratooyinka dalkeena.

Qodobka 22aad

Noocyada Ruqsaddaha




1. Noocyada ruqsadaha ay bixinayso Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga waxaay kala yihiin:-

b) Ruqsadda Cawska

- i. Cawska loo gooyo dhoofka xoolaha ee ka yimaada goobaha sida gaarka ah loo leeyahay (Private enclosures).
- ii. Ruqsadda cawska lama siin karo qofka ka ganacsada cawska ka baxa dhulka la wada leeyahay
- iii. Qofka ka ganacsada calafka xoolaha waxaa ka reeban in uu xidida ama rajiyo calafka xoolaha.
- iv. Waa mamnuuc in ruqsadda cawska lala kala wareego (Transfer licence).

t) Ruqsadda Dhuxusha

- i. Wasarada horumarinta reer miigu ma bixin karto ruqsad cusub oo ka ganacsiga dhuxusha ah laga bilaabo marka xeerkani soo baxo
- ii. Ruqsadda ka ganacsiga dhuxushu ee imika jirtaa ee ka horaysay xeerku waxa uu shaqaynayaa oo kaliya Xiliga kala guurka ah laga bilaabo marka sharcigan la ansixiyo.
- iii. Ruqsadaha ka ganacsiga dhuxushu waxay dhacaysaa marka uu dhamaado xiliga kala guurka.
- iv. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsad ka ganaci dhuxuleed ee mudada xiliga kala guurka ah, waxaa ka reeban in ay

- 
- gooyaan ama shidaan nooc kasta oo dhirta qoyan ah marka laga reebo geedka garan-waaga ah.
- v. Qof kasta ama shirkad kasta oo haysata ruqsad ka ganacsi dhuxuleed ee mudada xiliga kala guurka ah, waxaa reeban in si ulakac ah loo dhaawaco dhirta qoyan, taasoo ujeedadu tahay in geedku qalalo kadibna ay dhuxulaystaan.
 - vi. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsadda ka ganacsiga dhuxusha ee mudada xiliga eek ala guurka ah, waxaa kaliya oo ay dhuxul ka sameyn karaan xaabada qalashay oo kaliya.
 - vii. Ruqsada dhuxusha ee xiliga kala guurka ah lalama kala wareegi karo (transfer licence).

j) Ruqsadda Nuuradda

- i. Qof kasta ama shirkada kasta oo haysata ruqsada ka ganacsiga nuurada waxaa ka reeban in lagu shido dhir qoyan.
- ii. Lama bixin karo ruqsad ama ogolaansho inta lagu jiro wakhtiga kala guurka, wakhtigaas oo ka bilaabmaya maalinta la ansixiyo xeerkan.
- x) Ruqsadda Ogolaanshiyaha Dhirta Guryaha Hortooda, Dhulka la Degaamaynayo & Dhirta beeraha laga Goynayo.

Kh) Ruqsadda & Astaysta Goobaha Taawaradda, Macdanta, Ciida & dhagaxa

d) Cashuuraha iyo khidmadaha.

i. Cashuuraha & khidmaddaha ruqsadaha waxa wadadir u go'aami doona Gudi uu Wasiirka Maaliyadu ka magcaabo Wasaaraddiisa & Guiddi Wasaaradda deegaanka ah.

ii. Cashuuuraha iyo khidmaddaha ruqsadaha ku cad xeerkan waxaa qeexaya xeer-nidaamiyaha xeerkan.

Qodobka 23aad


Been abuur Ruqsad



1. Qof kasta oo:-
(B) Been abuura, beddela, ama masaxa shaambad calaamadeed ama saxeexa liisanka amma sharciga ama ruqsadda lagu gooyey xeerkan ama amar kastoo lagu bixiyey ama digniin kastoo lagu bixiyey.
(T) Jabiya shuruudaha liisanka (ruqsadda) ama ka soo bixi waaya shuruudahaas.
(J) Qaadata wax kastoo ka soo go'a kheyraadka dhulka, soona ururaya si sharci daro ah oo gaadiid ku qaadata si aan xeerkan waafaqsanayn.
(X) Hela ama isticmaala liisan aan si sharci ah lagu helin.
2. Waxaa uu mutaysanayaa Ganaaxa iyo xadhiga ku cad Qoddobka 24aad faqradiisa 2aad kheyraadka dhulka ka soo go'ay ee la soo qaatay, waa lala wareegayaa waana la xaraashayaa, qiimahoodana waxaa waxaa lagu wareejinayaa Qasnadda Dawladda.
3. Liisanka dambi lagu helo ama oggolansho dembi lagu helo waa lagala noqonayaa.

Qodobka 24aad

Ruqsad la Noqosho

- 
1. Qofkii caado ka dhigta inuu ku xad gudbo shuruudaha ruqsadda la siiyay, ruqsadda ama ogolaanshaha uu hayso waa laga qaadayaa, alaabta kheyrraadka lagu qabtay ee keentay in ruqsadda lagala noqdonaa waa lala wareegayaa.
 2. Qof kasta ama shirkad kasta oo ku xad gudubta shuruudaha lagu bixiyey liisaanka ka ganacsiga cawska xoolaha waxaa lagala noqonayaa Ruqsadii uu haystay, waxaa la saarayaa ganaax dhan laba malyuun illaa sadex Malyuun (2,000,000/=Slsh) illaa 3,000,000/=SLsh) ama xadhig dhan 3 bilood.

CUTUBKA 8AAD

XADGUDUBYADA

Qodobka 25aad

Awoodda Fulinta, Baadhida iyo Xidhida (Haynta)

1. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga ayaa awood u leh fulinta xeerkan heer kasta (Qaran, Gobol, Degmo iyo Tuulo). Haddii ay suurto gal tahay, dhaqan galinta xeerkan waan in uu hoos ka soo bilawda (grass root).
2. Maamulka heer qaran waa in uu xaliyaa xad-gudubyada ku saabsan xeerkan ee maamulada heer gobol ay u soo gudbiyaan.
 - i. Wasaaradda deegaanka iyo horumarinta reer miyigu waa in ay xalisaa, arimaha ay maamulada heer gobol xalin kari waayeen
3. Maamulada her gobol waxay u xilsaaran yihiin socodsinta (dhaqangalinta) xeerka ee goboladooda.
- I. Isuduwaha wasaarada iyo wasaaradda arimaha gudaha (badhasaabka & booliska gobolka) waxa ay dusha kala soconayaa dhaqangalinta

xeerkan ee heer gobol iyagoo la shaqaynaya degmooyinkooda.

II. Arimaha maamulka heer gobol u xalin kari waayo waxaa loo soo gudbinayaa heer qaran (hargeisa)

4. Maamulka heer degmo ayaa u qaabilsan dhaqangalinta xeerkan, waxayna ka koobanyiyhiin isuduwaha wasaarada ee degmada (wakiilka wasaarada). Gudoomiyaha degmada, taliyaha booliska degmada iyo waxgaradka degmada.

- i. Xad-gudubyada ka dhaca degmada ee ka dhan ka ah xeerkan ee lagula kaco deegaanka ama duurjoogta, waa in xalintooda loo cuskadaa sida xeerkani uu dhigayo
- ii. Dambiyada waa weyn ee ay adagtahay in heer, degmo lagu xaliyo waxaa la wareegaya xalintooda maamulada heer gobol.

5. Gudiga ilaalada deegaanka iyo duurjoogta ee heer tuulo waxa uu ka koobanyahay gudoomiyaha tuulada iyo afar xubnood, iyaga ayaa dhaqangalinaya xeerka oo indho iyo dhego u noqonaya maamulka heer degmo.


I. Gudigu waa in u si degdega aha u xidhaa oo uu degmada u gudbiyaa qof kasta oo gooya dhirta , geedaha, ugaadhsada duurjoogta ku nool aagaas (tuulooinka).

6. waa in la dhiiri galiyaa muwaadiniinta danaynaysa ilaalinta deeganka si ay uga qayb qaataan joojinta dhibaatada lagu hayo kheyraadka dabiicia ah .

7. dadka magaca ku dhex leh bulshada Somaliland ee danaynaysa ilaalinta deegaanka wuxuu sharcigu u ogolyahay in ay si nabadgallyo ah u joojiyaa dhibaatada

loo gaysanayo deegaanka oo ay isla mar ahaantaa u gudbiyaan maamulka tuulada, degmada,gobolka, ama heer qaran.

Qodobka 26^{aad}



Xuquuqda Hawl-Fuliyayaasha

- 1) Si loo dhiiri galiyo in ay dhaqan galiyaan Xeerkan, hawl fuliyayaasha heer degmo waxa guno ahaan loo siinyaa 30% (boqolkiiba sodon) dhakhaliga ka soo baxa ganaaxa laga qaado dambiilaasha ee degmada.
- 2) Alaabta kheyraadka ee la qabto waxaa lagu wareejinyaa wasaarada deeganka iyo Hormarinta reer Miyiga oo markaasi xaraashaysa (iibinaysa), wixii ka soo baxana ku wareejinaysa Sanduuqa Ilaalinta Deeganka ciddii lagala wareegayna waxay Mutaysanaysa ciqaab.
- 3) Dakhliga xaraashka ka soo baxa waxaa laga jarayaan 30% si loogu fuliyo hawasha ku xusan qodobkaan faqaraadiisa 1aad.
- 4) Dakhliga xeerkan waxaa si deg deg ah loogu xareynayaan khasnadda sanduuqa ilaalinta deeganka ee ugu dhaw goobta lagu qabtey dakhliga.
- 5) Wasaarddu waa in ay abuurtaa ciidan ama ilaalo ugaar ah baadhista, ilaalinta iyo socodsiinta xeerkan si loo badaadiyo deeganka, dhulka, geedaha. Duurjoogta, biyaha iyo wax alaale wixii la xidhiidha deeganka iyo cimiladiisa
- 6) Ciidankaas ama ilaaladaas waxa loo bixinayaan ciidanka ama ilaaladda badbaadada deeganka

7) Ciidanka ama ilaalada deeganka ku xusan qdobka faradiisa 5aad waa in ay xidhaan dirays gaar ah oo ay ka muuqto astaab la aqoosan karo.

Qodobka 27^{aad}

Xad gudubyadda ka-dhanka ah Duur-joogta

1. Qof kasta oo; -

(B) Ugaadhsada ama qaata duurjoogta shimbir, habardugaagta xamaartooyinka ama

(T) Kaxaysto (gaadiid ku qaata), haysta duurjoog shimbiro, habardugaagta, xamaaratoooyinku ama kaysada qayb ka mid ah xubnaheeda, ama

(J) Qaata duurjoog, shimbiro. Habardugaag, xamaartooyinka si uu uhu istcmaalo cilimi baadhis ahaan, waxabrsno ahaan, ama tamashalyan (ku il-doogsi ahaan) ama

(x) Qaata duurjoog shimbiro, habardugaagta xamaartooyinka si uu u bacrimiyo.


2. Waxa uu muteysanayaa ciqaabta iyo/ama ganaax ku xusan qdobka 28aad farqadiisa (3aad & 4aad

Qodobka 28^{aad}

Ciqaab

1. Qofka ku xad-gudba qodobka 27^{aad} ee xeerka waxa uu mutaysanayaa xadhig aan ka yarayn sanad iyo ganaax dhan ugu yaraan saddex malyuun (**3,000,000/=slsh**), iyadoo oo loo eegayo baaxada xad gudubka uu ku kacay oo Ciqaabiisu la sii kordhayso.





2. Ciqaabta ama ganaax ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad waxaa u dheer dambiiлаha oo ay maxkamadu ku xukumayso in uu hagaajiyo dhibaatadii uu gaysatay.
3. Ajaanibka ku xad-gudba qodobka 27^{aad} ee xeerkan waxa uu mutaysanayaa Shan sano (5sano) oo xadhiga ah ama ganaax lacageed oo dhan afartan malyuun (**40,000,000/=s1sh**), iyadoo loo eegayo culayska kiiska iyo baaxadda xadgubka uu sameeyey,

Qodobka 29^{aad}

Hawl fuliyayaasha


Ilaalada deeganka ee ay wasaaradu u xil-saartay ilaalinta kheyraadka dhirta iyo duur-joogta wadanku waa booliska, ilaalada ama ciidamada gaarka ah ee badbaadinta deeganka iyo milateriga iyo ciidanka ammanka guud ahaan.

Qodobka 30^{aad}

Awoodaha hawl-fulyayaasha

1. Sarkaal kasta oo ka tirsan hawl fuliyayaasha waxa uu ka weydiin karaa qofka uu ka shakiyo inuu tuuso ruqsada ama ogaalanshaha uu haysto, Isagoo aan waaran maxkamadeed aan haysan.
2. Muwaadin kasta waxaa ku waajib ah inuu ku baruarujiyo, ilaalada deegaanka, Ciidanka booliska ee ugu dhow, ama xubnaha guddida deegaanka ee goobta uu joogo cidkasta oo ku hawalan ugaadhasi noockasta uu yahay.
3. Hawl fuliyaayashu waxay awood uleeyihin in ay;

(B) Istaajiyaan (joojiyaan) oo ay baadhaan gaadiidka ay ka shakiyaan in uu si sharci daro ahuu u sido geedo (ama dhir), duurjoog, habar-dugaag, shimbiro, xamaaratooyinka ama qayb ka mid ah jidhka/xubnaha noolahaas.



(T) Iyagoo waaran maxkamadeed sita in ay galaan guriga ay ka shakiyaan inay si sharci daro ah lagu hayo, kaydiinayo dhir, duurjoog, habar dugaag, shimbiro, hamaaratooyin ama qaybo ka mid ah jidhka/xubnahooda.

(J) In ay qabtaan geedo, duurjoog, shimbiro, gabardugaag, shimbiro, xamaratooyin iyo qayb ka mid ah jidhkooda/xubnahooda iyo qalabkii loo isticmaalo in danbiga lagu galoo.

(x) Sarkaal ama hay'ad kasta oo ka tirsan hawl fuliyeenada oo qabta shay si Waafaqsan xeerkan waa in uu/ay rasiidh (receipt) ujaraa cidda/qofka uu ka qaaday isla markaana uu wargaliyaa wasaaradda.


Qodobka 31^{aad}

La wareegid

Hadii qodobadan xeerkan la jabiyo, maxkamadu:

(B) Iyadoo eegaysa culayska kiiska waxay amraysa in la, la wareego qalabkii ama gaadiidkii loo isticmaalay in lagu qaado khayraadka dhirta, duurjoogta ama qaybaha jidhkooda.

(T) Diyaaradaha qaada ama lagu ogaado inay qaaday khayraadka dhirta geedaha duurjoogta ama qaybaha jidhkooda waxaa uu mutaysanayaan



1. Wuxuu qof lagu soo oogo fal danbiyeed oo ku xad-gudbay xeerkan, culeyska cadayntu (burden of proof) waxa ay saarantahay (ay tahay in ay cadayso) Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.
 2. Haday cadaystaan diyaaradahaasi qaadista khayraadka dhirtaasi geedaha duurjoogta ama qaybaha jidhkooda waxa lagala noqonayaan ruqsada duulimaadka dalka iyadoo ganaax laba lab ahna la saaraayo oo noqonaaya boqol & lixdan malyuun (160,000,000/=SLsh) oo dollarka maraykanka ah, Wuxuu qof lagu soo oogo fal danbiyeed oo ku xad-gudbay xeerkan, culeyska cadayntu (burden of proof) waxa ay saarantahay (ay tahay in ay cadayso) Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.
- (j)** Hadii eedeeysanaha ama eedeeysanayaasha lagu waayo danbi, maxkamadu waxay amraysaa in hantidii lagala wareegay loo celiyo.
- (x)** Hadii shay (qalab) la soo qabtay ay maxkamadu amarto in aan lagala wareegin qofka lagu qabtay, qalabka waa la haynayaan ilaa inta qofkaasi wada bixinaayo ganaaxa lagu xukumay, hadii uu ganaaxa sodon (30) maalmood gudahood uu ku wada bixin waayo, qalabkaas waa la xaraashayaan si ganaax loogu bixiyo.

Qodobka 32aad

Culeyska Cadaynta

Hadii qof lagu soo oogo fal danbiyeed oo ku xad-gudbay xeerkan, culeyska cadayntu (burden of proof) waxa ay saarantahay (ay tahay in ay cadayso) Wasaarada Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.

Qodobka 33aad

Racfaan Qaadasho

Danbiilaha ciqaabta xeerkan dhigayo lagu xukumo, wuxuu xaq u leeyahay racfaan qaadasho, hadii uu ku

qanci waayo xukunka ku dhacay, waxaanu u racfaan qaadanayaay maxkamada racfaanka ee awoodaleh.



Qodobka 34aad

Tir-tirid

1. Xeerkasta, xeer-nidaamiye kasta, wareegto kasta iyo amarkasta oo qodabada xeerkan dhaqangalkiisa ka horyimaadda waa la tirtiray ama waxa loo badalay si waafaqsan nuxurka xeerkan
2. Heshiish kasta oo ka hor -imanaya xeerkan waa la-laaley.

Qodobka 35aad

Ogolaanshaha Heshiishyada Caalamiga ah

Jamhuuriyada Somaliland waxay tix galinaysaa heshiishyada calamiga ah ee ku saabsan ilaalinta dhirta iyo duur joogta oo ay ugu horayso shanta heshiish ee lifaaqa ku ah xeerkan

Qodobka 36^{aad}

Dhaqan gal

Xeerkan wuxuu dhaqan-galiyaa marka golayaasha xeerdejintu ansixiyaan, madaxwaynuhuna saxeexo faafinta rasmiga ahna lagu soo saaro.

References

- 1- Somalia fauna and forest conservation (law No.15/1969)

- 
- 2- Somaliland law on the prevention of deforestation &Desertification (Law No 04/98)
 - 3- Eretrea Forest and Wild Proclamation Act
 - 4- MoERD Budget 2014

(Anex 1): Heshiisyada Caalamiga ah

Jamhuuriyada Somaliland waxa ay ku dadaali doontaa sidii ay qayn uga noqon lahayd heshiisyada muhiimka ah ee Caalamka ee ku saabsan ilaalinta duurjoogta iyo dhirta, shantan heshiis ee hoos ku qoran ayaa ugu muhiimsan :

1. Heshiiska Caalamiga ah ee Ka Ganacsiga Dhirta iyo Duurjoogta Dabar go'a halista ugu jira (waxaa loo soo gaabiyaa CITES

CITES waa heshiiska ugu caansan heer caalami ee ku saaban ilaalinta dabiicigaa (nature). Waxa uu mammuucaya ka ganacisga duurjoogta iyo dhirta halista ugu jira ina aya dabargo'aan.

Heshiiskani saddex qaybood ayuu u kala saarayaa dhirta (flora) iyo dhirta dubatada (fauna):

B.Lifaaqa 1(appendix 1). Waxaa uu kontarolayaa ka ganaciga duurjoogta, dhirta iyo qaybaheeda, waana mamnuuc ka ganacisgoodu hadii aan ogolaansho laga hysan wadamada laga qaadayo iyo wadamada loo dhoofinyo labadaba. Maroodiga iyo noocyada kaymaha afrika ayaa qaybtan soo hoos galaya. Marxaalada Somaliland hadii aan eegno waxaa qayntan hoos imanaya noocyada naasleyda sida cawsha, dibtaag, shimbiraha qaypta waxaa kamida wersengeli linnet, little brown and hueglin's bustard, golden-winged grosbeak iyo Cabeebka (Somali thrush). Somaliland waxay ay diyaar u tahay in ay saxeexdo heshiiska muhiimka ah.

T.Lifaaqa 2 (appendix). Waxa qaybtani ay ka hadlysaaduurjoogta iyo dhirta aan wakhtigan haatan ee la joogo dabargo'a halista ugu jirin ee laakiin mustaqbalka dabargo'i karta, ka ganacigooduna u baahanyahay ruqsad dalka laga qaadayo iyo dalka loo dhoofinyo labadaba. Lifaaqan (qaybtan) waxaaa hoos iman kara harmacadka , diinka, desert wart hog iyoy kori bustard.

J.Lifaaqa 3(appendix 3) waxa uu ku saabsan yahay heshiisyo ay wadamada qaarkood wada galeen si ay u xakameeyaan ka ganacsiga dhirta, durfoogta iyo qaybahooda.wadamada Namibiya iyo Thailand waxa ay ku heshiyeein iney xakameeyaan ka ganacsiga harmacdka Africa.k

Somaliland waxa ay dadaali sidii ay heshiisyo ula gali lahayd wadamda carabta si loo mamnuuco ka ganacsiga Cawsh, Dib-taaga iyo Goroyada (Bustards).

2. Heshiiska Palermo.

Heshiiskani waxa uu ku saabsanyahay joojinta dambiyada iyo ka ganacsiga caalamiga ah ee dhirta iyo duurjoogta iyo qaybahooda. Ka Somaliland waxa ay dabynysaa in ay qayb ka noqoto heshiiska marka la eego ka ganacisa sharci darada ah ee lagu hayo duurjoogta dalka ee looo qaado wadamada carbta iyo meelo kaleba. Harmacadka, biciidka ayaa si sharci daro ah loooga dhoofuyaa magaalooiyika iyo tuulooyinka xeebaha.

3. Heshiiska Noolaha Kala Duwan (Biological diversity).

Heshiiskani waxa uu ku saabsan yahay ilaalinta deegaanka guuud ahaantii si looga hortago nabaad guurka iyo waxyelaynta kaymaha, biyo xidheenada/haraha/barkadaha iyo dhulka qoyan. Somaliland waxa ay diyaar u tahay in ay qayn ka noqoto heshiiskan. Waxa la asaasay sandkii 1994 shirkii Rio De Jannero ee 1992 kadib.

4.Heshiiska Qaramda Midoobey ee ka Hortaga Xaalufka.

Waxa uu ka soo bilawdey shirkii taariikhiga ahaaa ee Rio summit ee 1992 kii. Heshiiskani waxa uu ku saabsan yahay

dhulalka lama degaanka ah ee aduunka. Waxaa mararka qaar loo yaqaan "Heshiiska dhulka Qalalan" kaas oo loogu talo galay wax ka qabadka iyo maareynta caafimaadka noolaha dhulkaasi ee ay dhibaatadu ka so gaadhat isticmaalka xaddhaafka ah iyo isbedalka cimilada loona yaryan lahaaa xaalufkaiyo baaba'a noolaha kala duwan.waxa heshiiskani wacyi gelinta caalamiga ah dhigaya ay faa'iido weyni ugu jirta qaaradda afrika gaar ahaan wadamada sahara(Saxaraha) ka hooseya ilaa wadamada geeska afrika. Somaliland waa in ay heshiiskan qeyb ka noqoto iyadoo u sii marysa barnaamijka urur goboleedka (Sub Regional National Action Programs) .22 bisha may sanad kasta waxaa adduunweynaha laga sameeyaa wacyi gelin (International Day for Biodiversity).

5.Heshiiska Qaramda Midoobay ee Isbedelka Cimilada (Climate Change)

Heshiiskan u jeedadiisu waa sidii loo yarayn lahaa walxaha hawada lagu sii daayo ee isbedelka Cimilada sababta u ah. Walxahaas waxaa ka mid ah sida Karbon-laba Oxide (Carbon Dioxide) ama gaasa kale, waxyna ka dhashaan isticmaalka shidaalka iyo shidida dhuxul dhagaxa. Heshiiska waxa diirada saarayaa wadamada horey u maray (developed and fast developing economies) maadama ay yihin kuwa qaybta wey ka qaata isbedelka Cimilada.afrika oo ay somalilnd ku jirto, wax saameyn la taaban karo kuma laha isbedelka Cimilada. Laakiin dhuxusha iyo geedaha la shidayo waxa ay qayb ka yihin isbedelka cimilada.

C/risaaq Siciid Ayaanle

Baashe Maxamed Faarax

**Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada JSL Ku-simaha
Gudoomiyaha ahna Gudoomiye Ku-xigeenka 1aad ee Golaha
Wakiilada JSL**

QAYBTA LABAAD:

**XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAYA.**



REPUBLIC OF SOMALILAND
 **THE PRESIDENT**

JSL/M/XERM/249-3757/012016

DATE....03/01/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0572/012016

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Farqadiisa 3aad,
Xarafka (kh) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Ahmiyadda ay Agaasimayaasha Guud ee Wasaaraduhu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada JSL;

Markuu La Tashaday: Madaxda ay khusayso;

Markuu ku Qancay:

In uu hanan karo, aqoon iyo
kartina u leeyahay jagadan,



Wuxuu Go'aansaday

In Marwo, Khadra X. Ismaaciil Yoonis (Khadra X. Gaydh), laga
bilaabo taariikhda maanta ay ahaato Agaasimaha Guud ee
Wasaaradda Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND
The seal of the President of Somaliland, featuring a central scale of justice, surrounded by the text "THE PRESIDENT" in a circular border.

JSL/M/XILO/249-3758/012016

DATE....03/01/16

Ku: **Mudane, Xasan Cabdi Madar**
Hargeysa
Agaasimihii Guud ee Hore ee Wasaaradda
Madaxtooyada

Ujeeddo: Xil Ka-Qaadis

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaan mudadii aad soo haysay
xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada.
Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto
noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibbo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa qaado xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Madaxtooyada ee Jamhuuriyadda Somaliland.



Haddaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Marwo, Khadra X. Ismaaciil Yoonis (Khadra X. Gaydh), oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XILO/249/1-3758/012016

DATE....03/01/16

Ku: G/sare, Axmed Cali Maygaag
Hargeysa
Taliyaha Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada JSL

Og: Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda
Somaliland Hargeysa

Ujeeddo: Beddel

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay xilka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa beddolo xilka Taliyaha Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Hadaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay G/dhexe, Axmed Daahir Cali oo aan xilkaa isaga ag u magacaabay.

Waxaan farayaa Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland inuu mas'uulkan u magacaabaabo xil ku habboon darajadiisa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3759/012016

DATE....03/01/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0573/012016

Magacaabid
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,
xarafka (d) ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda ay Ciidanka Ilaalada Madaxtooyadu u leeyihin dhismaha Qaranka;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Taliyaha Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada JSL;
Markuu Ka Fiirsaday:	Kartidiisa, aqooniisa iyo hufnaantiisa shaqo;
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo xilka loo magacabay;

Wuxuu go'aansaday

In G/Dhaxe, Axmed Daahir Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Taliyaha Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XILO/249/1-3758/012016

DATE....03/01/16

Ku: Dhamme, Cabdi Cismaan Ducaale
 Hargeysa

Taliye ku-xigeenkii Hore ee Ciidanka Ilaalada
 Madaxtooyada JSL

Og: Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda
Somaliland Hargeysa



Ujeeddo: Beddel

Mudane,

Waxaan kaaga mahadinayaa mudadii aad soo haysay xilka Taliye ku-xigeenka Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland. Xilalka Qaranka ayey dabcigeed tahay in ay meerto noqoto oo kolba cid hanan karta loo dhiibo.

Sidaas darteed, waxaan gartay in aan kaa beddeelo xilka Taliye ku-xigeenka Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Hadaba, waxaan kaa rajaynayaa in aad si niyad sami ah ugu wareejiso xilka aad haysay Dhamme, Axmed Jaamac Ducaale (Alyoos) oo aan xilkaa isaga ah u magacaabay.

Waxaan farayaat Taliyaha Ciidanka Booliska Jamhuuriyadda Somaliland inuu mas'uulkan u magacaabaabo xil ku habboon darajadiisa.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3761/012016

DATE....03/01/16



Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad, xarafka (d) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Ciidanka Ilaalada Madaxtooyadu u leeyihiin dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Taliye Ku-xigeenka ciidanka Ilaalada Madaxtooyada JSL;
- Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;
- Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Dhamme, Axmed Jaamac Ducaale (Alyoos), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Taliye Ku-xigeenka Ciidanka Ilaalada Madaxtooyada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:
DIKREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM:

Jamhuuriyadda Somaliland.



Guddida Doorashooyinka Qaranka

*Xeernidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha*

Xeer Lr. 01/2015

Somaliland Voter Registration Regulation

TABLE OF CONTENTS

- Cutubka Koowaad. Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha
Qaybta koowaad: qodobo Guud
Qodobka 1^{aad}: Magaca Xeer Nidaamiyaha..
Qodobka 2^{aad}: Qeexitaano..
Qodobka 3^{aad}: Mabaadi'ida Guud.
Qodobka 4^{aad}: Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha
Qaybta Labaad:
Qodobka 5^{aad}: Wacyigelinta Hawlaha Diwaangelinta
Codbixiyayaasha.



Qaybta Sadexaad: Geedi-socodka Hawsha Diwaangelinta
Codbixinta.

Qdobka 6^{aad}: Dadka ay ka Reeban tahay in la Diwaengeliyo.

Qdobka 7^{aad}: Bilawga iyo Dhamaadka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha.

Qdobka 8^{aad}: Geedi-socodka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha
Cutubka Labaad

Maamulka Diiwaangelinta Codbixinta..

Qaybta kowaad:

Qdobka 9^{aad}: Aasaaska Guddiga Farsamo ee Hawlaha
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qdobka 10^{aad}: Ujeeddada Guddiga Farsamo ee Hawlaha
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qdobka 11^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Farsamo ee
Hawlaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qdobka 12^{aad}: Xarunta Guddida Farsamo

Qdobka 13^{aad}: Kulanadda Guddida

Qaybta Labaad: GUDDIDA ILAALINTA IYO HABSAMI-U-SOCODKA
Diiwaangelinta CODBIXIYAYAASHA (Monitoring Board)..

Qdobka 14^{aad}: Ujeeddada loo Aasaasay Guddida:

Qdobka 15^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddida:

Qdobka 16^{aad}: Awooddha Guddida:

Qdobka 17^{aad}: Tirada Xubnaha Guddida iyo Qaabka Soo-
Xulisteeda.....

Qdobka 18^{aad}: Shuurudaha Lagu Soo Xulayo Xubinta Guddida..

Qdobka 19^{aad}: Muddada Xilka ee Guddida.

Qdobka 20^{aad}: Wadashaqaynta KDQ iyo Guddida.

Qaybta sadexaad: .

Qdobka 21^{aad}: Aasaaska Guddi Hawleedka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha ee Heer Gobol "Regional Operation Team (ROT)"..



Qodobka 22^{aad}: Ujeeddada Guddi Hawleedka..

Qodobka 23^{aad}: Xilka iyo Waajibaaadka Guddi Hawleedka.

Qaybta AFRAAD..

Qodobka 24^{aad}: Hawl-wadeenada Diiwaangelinta Codbixiyayaasha,

Qodobka 25^{aad}: Gunada Hawl-wadeenadda.

Qodobka 26^{aad}: Hawl-wadeenada Goboladda iyo Degmooyinka ee komishanka.....

Qodobka 27^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka..

Qodobka 28^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Gobolka

Qodobka 29^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiye-ku-xigeenka Gobolka.

Qodobka 30^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Xidhiidhiyaha Gobolka (Coordinator).

Qodobka 31^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Degmadda.....

Qodobka 32^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Xooghayaha Degmadda

Qodobka 33^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Tiriyaha Xafiiska Degmadda.

Qodobka 34^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Hubiyaha Degmadda

Qodobka 35^{aad}: Dhaarta Hawl-wadeenadda Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qodobka 36^{aad}: Hawl-wadeenadda ka Hawlgalaaya Goobaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.....

Qodobka 37^{aad}: Shuruudaha laga rabo Hawl-wadeenadda Goobaha Diiwaangelinta.....

Qodobka 38^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Goobta

Qodobka 39^{aad}: Xilka xog-geliyaha (Operator)

Qodobka 40^{aad}: Xilka xog-Ururiyaha (interviewer).

Qodobka 41^{aad}: Shaqaalaha Amniga

Qodobka 42^{aad}: Doorka Shaqo ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha..

Qodobka 43^{aad}: Sugitaanka Muwaadinka..



Qodobka 44^{aad}: Xaqiijinta D'da Codbixiyaha.

Qaybta Shanaad.

Qodobka 45^{aad}: Wakiiladda Axsaabta.

Qodobka 46^{aad}: Waajibaadka iyo Masuuliyadda Wakiltada Axsaabta.

Siyasadda

Qodobka 47^{aad}: Shuuruudaha Wakiilka Xisbiga.

Qodobka 48^{aad}: Kormeerayaasha Caalamiga ah iyo kuwa Wadaniga ah.

Qodobka 49^{aad}: Saxaafadda Maxaliga ah iyo Ta Caalamiga ah

Qodobka 50^{aad}: Tababarka Hawl-wadeenada Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qodobka 51^{aad}: Ilaalinta xogta Diiwaangelinta.

Cutubka Saddexaad: Agabka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha..

Qaybta koowaad:

Qodobka 52^{aad}: Qalabka/Agabka Xafiisyada Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qodobka 53^{aad}: Diyaarinta Goobaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

Qodobka 54^{aad}: Nidaamka Goobta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qodobka 55^{aad}: Wakhtiga Hawlgalka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

Qaybta Labaad:

Qodobka 56^{aad}: Foomka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

Qaybta Sadexaad: Habka Diiwaangelinta Codbixinta..

Qodobka 57^{aad}: Habka Diiwaan Gelinta Codbixiyeyaasha.

CutubkaAfraad: Diidmada Iyo Cabashooyinka..

Qaybta Koowaad..

Qodobka 58^{aad}: Diidmada Codsiga Diiwaangelinta

Qaybta Labad.



Qodobka 59^{aad}: Cabashooyinka ka dhanka ah Diidmada Codsigaa Is-Diiwaangelinta.

CutubkaShanaad: Xidhitaanka Goobta Diiwaangelinta.

Qaybta Koowaad:

Qodobka 60^{aad}: Xidhitaanka Hawsha Diiwangelinta Codbixiyeyaaasha iyo wareejinta Qalabka/Agabka.

CutubkaLixaad: Liistada Hordhaca ah.

Qaybta kowaad

Qodobka 61^{aad}: Soo Saarida Liistada Diiwaangelinta

Codbixiyeyaaasha ee Hordhaca ah.

Qaybta Labaad:..

Qodobka 62^{aad}: Cabashooyinka La xidhiidha soo saarida Liistada Hordhaca ah.

Qodobka 63^{aad}: Foomamka Cabashada

Qodobka 64^{aad}: Muddada la samayn karo Cabasho iyo Rafcaanada.

Qodobka 65^{aad}: .Go'aanka Gaadhida Cabashooyinka La xidhiidha Liistada Hordhaca ah.....

Qaybta Saddexaad:

Qodobka 66^{aad}: Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyeyaaasha ee maamul.....

Qaybta Afraad:

Qodobka 67^{aad}: Diiwaanka codbixiyeyaaasha ee Kama danbaysta ah..

Qodobka 68^{aad}: Qaybinta Kaadhka Codbixinta..

Qodobka 69^{aad}: Lumista kaadhka Codbixinta

Qodobka 70^{aad}: .Wax-ka-bedelka Diiwaanka Codbixiyeyaaasha ee Rasmiga ah.

Cutubka Todobaad: Qodobo kala duwan

Qaybta Koowaad:..

Qodobka 71^{aad}: Reebanaanta Hal kaadh Wax ka Badan

Qodobka 72^{aad}: Xogta Khaldanta.

Qodobka 73^{aad}: wax-ka bedel.

Qodobka 74^{aad}: .Dhaqangal



Lifaaqa kowaad: Goobaha Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha ee

Degmo /Gobol.....



Republic Of Somaliland Jamhuuriyadda Somaliland.
National Electoral Commission Guddida
Doorashooyinka Qaranka.

Ref: GDQ/____/____/2015

Taariikh: 25/12/2015

Komishanka Doorashooyinka Qaranku

Markuu Arkey: 45^{aad} ee Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha (Xeer Lr. 37/2007), ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2014.

Markuu Arkey: Qodobadda 27^{aad} Farqadiisa 3^{aad}, Qodobka 29^{aad}, Farqadiisa 1^{aad}, Qodobka 34^{aad} 1^{aad} iyo 2^{aad}, Qodobka 35^{aad} 4^{aad}, Qodobka 40^{aad}, farqadiisa 2^{aad}, ee Xeerka Diiwaangelinta Codbixinta (Xeer Lr. 37/2007), ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2014.

Markuu aqoonsaday: baahida weyn ee loo qabo diiwaangelin codbixineed oo sugaran, taas oo muhiim u ah geedi-socodka doorashooyinka iyo dimuquraadiyada dalka JSL.

Markuu Dhagaystey: Tallada la-taliyayaasha sharci ee Komishanka, iyo soo jeedintooda.

Markuu Xaqiiqsaday: in diiwaangelinta codbixintu u baahan tahay xeer-nidaamiye faahfaahinaya Qodobadda Xeer Lr. 37/2007.

Wuxuu soo saaray, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha (**Xeer Lr. 01/2015**).

Allaa Mahad Leh.

Saxeexa Xubnaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka:

1. Cabdiqaadir Iimaan Warsame	Gudoomiye	_____
2. Maxamuud Xassan Wacays	G/ku-xigeen	_____
3. Cabdifataax Ibraahim Xassan	Xubin	_____
4. Kaltuun Sh. Xassan Cabdi	Xubin	_____
5. Cabdiraxmaan Cismaan Aadan	Xubin	_____
6. Maxamed Jaamac Maxamed	Xubin	_____
7. Saciid Cali Muusa	Xubin	_____

8. Cutubka koowaad

**Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha
Qaybta Koowaad: Qodobo Guud**

***Qodobka 1^{aad}:* Magaca Xeer Nidaamiyaha**

Xeer nidaamiyahani waxa loogu yeedhaa “Xeer Nidaamiyah Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha” (“**Xeer Lr. 01/2015**”).

Qodobka 2aad: Qeexitaano

Haddii aanu Xeer nidaamiyahani ama Xeerka si ka duwan ugu xusnayn, macnaha erayadda soo socda waxa Xeer nidaamiyahani gudahiisa loola jeedaa, sidan hoos ku qoran:

Diiwaangeliye: waxa loola jeedaa hawl-wadeenadda Komishanka ee ka hawlgalaya diiwaangelinta codbixiyaha.

Diiwaangelin: waxa loola jeedaa diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee uu ka masuulka yahay Komishanku.

Golayaasha Qaranka: Waxa loola jeedaa Golayaasha Qaranka JSL sida baarlamaanka, xukuumadda iyo garsoorka.

Komishan: waxa loola jeedaa Guddida Doorashooyinka Qaranka.


Xeer: waxa loola jeedaa Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha (Xeer Lr. 37/2007) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2014.

Wasaarad: Waxa loola jeedaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee JSL.



Qodobka 3aad: Mabaadi'ida Guud

Xeer-nidaamiyahani waxa lagu maamulayaa loona adeegsanayaan dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.




Qodobka 4aad: Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Komishanku waxa uu dhaqangalin doonaa Diiwaangelinta Codbixiyeyaasha si waafaqsan Xeerka iyo Xeer nidaamiyahani.
2. Komishanku isagoo raacaaya Xeerka iyo Xeer nimdaamiyahaniwaxa uu dajinayaan dhammaan qorshayaasha ay u baahantahay diiwaangelin sax ahi.
3. Komishanku waxa uu samaynayaan dhamaan diyaargarawga looga baahan yahay si uu u dhaqan-geliyo hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha oo mudeysan.
4. Komishanku waxa uu baahinayaan xilliga loo cayimay Diiwaangelinta gobol kasta iyo dhammaan wixii xog ah ee ay muwaaddiniintu u baahan yihiin in ay ogadaan.

Qaybta Labaad:

Qodobka 5aad: Wacyigelinta Hawlaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Komishanku waxa uu ka hirgelin doonaa dhammaan gobolada dalka wacyi gelin balaadhan oo uu dadka ugu sheegayo muhimadda ay leedahay diiwaangelinta codbixintu iyo siyaabaha la isu diiwaan-gelinaayo.
2. Komishanku marka uu fulinaayo qodobkan, waxa uu adeegsan doonaa aaladaha warbaahineed ee dalka ee suurto-galka ah isagoo samaynaaya barnaamijyo wacyigelineed oo kor u qaada fahamka dadka ee dhinaca diiwaangelinta codbixinta.
3. Marxaladdani waxa ay noqonaysaa muddo aan ka yarayn 15 maalmood oo muwaadiniinta gobol kasta lagu wacyigelinayo in ay u diyaar-noqdaan Diiwaangelinta Codbixiyayaasha;

- 
4. Komishanku waxa kale oo uu sameyn doonaa wacyigelin heer qaran ah, oo guud ahaan bulshada Somaliland wacyigooda kor loogu qaadayo, isaga oo adeegsanaya aaladaha warbaahineed ee dalka ka jira.
 5. Komishanku isaga oo fulinaya qodobadda kor ku xusan waxa uu soo saari doonaa fariimmo, qoraallo, suugaan, iyo qaab kasta oo kale oo ay ula muuqato in lagu gaadhsiin karo bulshada fariinta wacyigelinta.


Qaybta Saddexaad: Geedi-socodka Hawsha Diiwaangelinta Codbixinta

Qodobka 6^{aad}: Dadka ay ka Reeban tahay in la Diwaangeliyo

1. Dadka ay ka reeban tahay in loo diwaangeliyo codbixiye ahaan:
 - a) Muwaadin aan xiskiisu dhamayn;
 - b) Maxaabiista xukuman ama garsugayaasha ah;
 - c) Ajnabiga dalka gudihiiisa ku sugaran;
 - d) Qof aan qaangaadh ahayn.

Qodobka 7^{aad}: Bilawga iyo Dhammaadka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Gobol kasta inta aan laga bilaabin Diiwaangelinta Komishanku waxa uu baahinayaa waqtiga ay gobolkaasi ka qabsoomi doonto diiwaangelintu.
2. Diiwaangelintu waxa ay ka soconaysaa gobol kasta 28 maalmood oo kala ah:
 - a. Deegaanadda miyiga ah oo ay ka socon doonto 7 casho.
 - b. Caasimadaha Goboladda oo ay ka socon doonto 14 casho, iyo 14 casho oo ah kaabis lagu reebi doono kooxo diwaangelineed goobo gaar ah oo uu Komishanku cayimo.

- 
- c. Magaala madaxda degmooyinka waxa ay ka soconasaa 7 casho iyo 21 casho oo kaabis ah, oo kooxo gaar ah lagu reebi doono goobaha qaarkood, kuwaas oo Komishanku cayimi doono.
 - d. Haddii uu lagama maarmaan u arko Komishanku, degmooyinka goboladda qaarkood muddada ay diiwaangelinta ka dhacaso waxa uu raacin karaa gobol kale.
3. Komishanku waxa ay soo saari doonaan jadwal mudaysan oo ay si cad ugu muujinayaan qorshaha hawlgalkooda.
4. Faafinta jadwalka ka dib, haddii Komishanku lagama maarmaan u arko wax ka badel ayuu ku sameyn karaa qorshahooda hawl-gal.

Qodobka 8aad: Geedi-socodka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

- 1. Geedi-socodka diiwaangelinta codbixiyayaashu waxa uu ka koobnaan doonaa shan (5) mar-xaladood oo is daba-joog ah, lagana hirgelin doono gobol kasta oo dalka ah xilli u gaar ah, iyada oo marba gobol laga hirgelin doono.
- 2. Shanta (5) marxaladood waxa ay kala yihiin:-

A. Marxaladda kowaad: diyaar-garowga.

- i. Marxaladdani waxa ay noqonaysaa muddo aan ka yarayn 15 maalmood oo Muwaadiniinta Gobol-kasta lagu wacyi-gelinayo in ay u diyaar-noqdaan Diiwaangelinta Codbixiyayaasha;
- ii. Marxaladan waxa la qaadanayaa dhamaan hawl-wadeenadda diiwaangelinta codbixiyayaasha waxana la qabanayaa dhammaan tababaradda shaqaalah ka hawl galaya Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

B. Marxaladda Labaad:
Codbixiyayaasha ee rasmiga ah:-



- i. Marka ay dhamaato mar-xaladda diyaargarowgu, waxa ku xigi doona muddo aan ka yarayn todoba (7) maalmood oo ay gobol kasta ay tagayaan kooxo hawl-wadeeno ah, tiradoodana uu goynayo Komishanku, si ay u hirgeliyaan Diiwaangelinta rasmiga ah ee Codbixiyayaasha.
- ii. Marka ay dhamaato todobada (7) casho ee Diwaangelintu, gobol kasta waxaa lagu reebi doonaa kooxo kaabis ah oo diwaangeliya qof kasta oon is-diwaangelin muddadii todobada (7) casho ahayd ee hore.

C. Marxaladda Sadexaad: marka ay soo gabagabowdo hawsha diiwaangelinta ee goboladda iyo degmooyinku xogta ku jirta serverka guud ee yaala Xarunta Komishanka ayaa kala shaandheyn doona muwaadiniinta is-diwaangelisay, kana saari doona cidii hal mar wax ka badan is-diwaangelisay.

- i. Marka ay dhamaato hawsha kala saaridu Komishanku waxa uu soo saari doonaa liistada hordhaca ah ee diiwaangelinta codbixiyayaasha, oo lagu dhajin doono goobaha uu Komishanku u cayimo, ee gobol kasta ama/yo degmo kasta.

D. Marxaladda Afraad: Cid kasta oo ka cabanaysa liistada hordhaca ahi waa in ay cabashadeeda kusoo gudbisaa muddada uu xeernidaamiyahani u xadidey, go'aana laga gaadhaa.

E. Marxaladda Shanaad: Kadib marka go'aan laga gaadho dhamaan xogaha khaldan, lana sameeyo sixitaanka ku munaasibka ah, Komishanku waxa uu soo saari doonaa diiwaanka rasmiga ah ee codbixiyayaasha, waxanu muwaadiniinta ku jira

diiwaanka ee haysta cadaynta is-diiwaangelinta (certificate of registration) u qaybin doonaa Kaadhka Codbixiyaha.



Cutubka Labaad
Maamulka Diwaangelinta Codbixinta
Qaybta Koowaad:

**Qodobka 9^{aad}: Aasaaska Guddiga Farsamo ee Hawlaha
Diwaangelinta Codbixiyayaasha**

1. Waxa halkani lagu aasaasay Guddida Farsamo ee hawlaha diwaangelinta codbixiyayaasha.
2. Xubnaha Guddidu waxa ay ka koobnaan doonaan:
 - a. Laba xubnood oo Komishanka Doorashooyinka Heer Qaran ah;
 - b. Laba xubnood oo ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
 - c. Saddex Xubnood oo ka kala socda Xisbiyada Siyaasadda.
3. Guddida Farsamo waxaa la hawl-gelinaya isla marka la ansixiyo Xeernidaamiyaha waxaanay shaqadoodu dhammaanaysaa marka hawsha diwaangelinta la dhammays tiro, lana soo saaro liiska ugu danbeeya. Hase yeeshee markasta oo ay Diwaangelini jirto Guddida dib ayaa loo abuuraya.
4. Guddida waxaa Guddoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen u ah labada Xubnood ee ka socda Komishanka Doorashooyinka.
5. Xubnaha Guddida Farsamo waxa ay saxeexi doonaan Xeerka Anshaxa ee Guddida Farsamo.
6. Guddida farsamo waxa ka reeban in ay ka mid noqdaan:
 - a) Xubnaha Golayaasha Qaranka.
 - b) Qof aan muwaadin ahayn.
 - c) Qof xiskiisu dhiman yahay.
 - d) Qof ka yar 30 sanno jir.
 - e) Qof xil kasnimo darro ka muuqato.

Qodobka 10^{aad}: Ujeeddada Guddiga Farsamo ee Hawlaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Ujeeddada Guddida Farsamo waa:
 - a) In ay Komishanka ka caawiyaan habsami u socodka hawlaha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
 - b) In ay ka talo bixiyaan dhaqangelinta diiwaangelinta codbixiyayaasha.

Qodobka 11^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddiga Farsamo ee Hawlaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

Xilka iyo Waajibaadka Guddidu waa:

1. In ay Komishanka kala taliyaan farsammo ahaan qaabka loo hirgalinayo diiwaangelinta codbixiyayaasha.
2. In ay kala qaybgalaan kana taageeraan wixii hawl ah ee Komishanku uga baahdo.
3. Ka talo bixinta caqabadaha farsamo ee laga yaabo in ay soo food saarto hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
4. In ay xidhiidhiyaan xafiisyadda ay matalaan iyo Komishanka;
5. In ay la socod siiyaan xafiisyadda ay matalaan geedi-socodka hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
6. In ay la socdaan nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaashu uga socoto gobolada iyo degmooyinka dalka JSL, wixii tallo iyo tusaale ahna u gudbiyaan Komishanka.
7. Haddii Komishanku uga baahdo, in ay kala qaybgalaan wacyigelinta gobolada iyo degmooyinka si loogu baraarujiyo bulshadamuhiiimadda ay leedahay diiwaangelinta codbixiyayaashu.

Qodobka 12^{aad}: Xarunta Guddida Farsammo

Xarunta Guddida farsammo waxa ay noqonasaan xarunta Guud ee Komishanka.

Qodobka 13aad: Kulanadda Guddida

1. Guddidu waxa ay fadhiisan doontaa todobaadkii hal mar, taas oo uu go'aamin doono Guddoomiyaha Guddidu, xubnaha kalana ogeysiin ku siin doono.
2. Haddii xaalad degdeg ah looga baahdo Guddoomiyaha Guddida ayaa shir deg-deg ah isugu yeedhi kara xubnaha Guddida.
3. Kooramka ay kulanadu ku qabsoomi karaan, waa marka ay joogaan kala badh iyo hal, ka mid ah xubnaha Guddidu.
4. Xubnaha Guddida Farsammo waxa ay xilka ku waayi doonaan:
 - a) Haddii uu/ay xubantu iskeed iskaga casisho,
 - b) Haddii ay xubantu geeriyoot;
 - c) Hadii uu jabo shardi ka mid ah shuruudihii lagu soo xushay;
 - d) Haddii uu ka baaqsado in uu ka qaybgalo saddex kulon oo isku xiga cudur daar la'aan.
5. Xubinta xilka banaysa, muddadii diiwaangelinta oon dhamaan waxa bedelkeeda xaq u leh, cida xubantu ay wakiilka ka ahayd.

Qaybta Labaad: GUDDIDA ILAALINTA IYO HABSAMI-U-SOCODKA Diiwaangelinta CODBIXIYAYAASHA (Monitoring Board)

QODOBKA 14aad: Ujeeddada loo Aasaasay Guddida:

1. Waxa halkan lagu aasaasay Guddida Ilalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta.
2. Ujeeddada Guddida loo aasaasay kor-u-qaadista suurto-galnimada in ay diiwaangelin sax ahi dalka ka qabsoonto, iyo in ay diiwaangelintaasi ku qabsoonto kuna gebo-gebawdo turxaan la'aan, si waafaqsan Sharciga iyo Xeerarka dalka.

Qodobka 15aad: Xilka iyo Waajibaadka Guddida:

1. Guddidu waxay u xilsaaran tahay:
 - a. Ilalinta Habsami-ugu-dhaqanka wax-kabetelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha

Dhaqangelinta

Diiwaangelinta

Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka iyo Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

- b. Xallinta khilaafaadka iyo murannada ka dhex dhasha xisbiyada dhexdooda, ee khuseeya Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada Siyaasada ee Diiwaangelinta.
 - c. Soo-saarista warbixino ku saabsan sida dhinacyadu ugu dhaqmayaan Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada iyo guud ahaanba Geeddi-socodka Diiwaangelinta.

Qodobka 16^{aad}: Awoodda Guiddida:

1. Guddidu waxay awood u leedadahay:-
 - a. Xallinta khilaaf kasta oo ka dhex-dhasha dhinacyada Xeerka Hab-Dhaqan ee Xisbiyada Siyaasada kala saxeexday;
 - b. Hubinta meel-marinta Xeerka Hab-Dhaqanka Xisbiyada Siyaasadda;
 - c. Ka qaadista tallaabo anshax-marineed oo Xeerka Hab-dhaqan waafaqsan xad-gudub kasta oo Guiddida ama wakiilladeedu ogaadeen dhicitaankiisa;

Qodobka 17^{aad}: Tirada Xubnaha Guiddida iyo Qaabka Soo-Xulisteeda

1. Guddidu waxay ka kooban tahay Toddoba aqoonyahan oo reer Somaliland.
 2. Guddidu waxa ay iska dhex doorayaan Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xog-haye.
 3. Guiddida waxaa soo xulaaya isla markaana magacaabaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
 4. Guddidu waxay lixda gobol-doorasho ee dalka ku yeelanaysaa min laba wakiil oo KDO uu soo xulo.

Iyagoo Guddidu u igmanaaya in ay waajibaadkooda ka fuliyaan Gobollada.

Qodobka 18aad: Shuruudaha Lagu Soo Xulayo Xubinta Guddida

Xubinta Guddida ahi waa in ay buuxiso shuruudahan hoos ku qoran:

1. In uu yahay/tahay qof sumcad wanaagsan ku leh bulshada.
2. Qof leh Go'aan qaadasho, karti, aqoon iyo waayo-aragnimo uu ku gudan karo mas'uuliyadda culus ee la saaray,
3. Ku sifoobay dhexdhedaadnimo siyaasadeed.
4. In uu leeyahay/leedahay xirfad uu ku qoro warbixin (report writing skills).

Qodobka 19aad: Muddada Xilka ee Guddida

1. Guddidu heer qaran muddo xileedkeedu waa lix bilood oo laga bilaabo maalinta ay saxeexaan heshiiska,
2. Gobolada xubnaha uga wakiil ka ah Guddidu waxa ay muddo xileedkoodu ku eyyahay laba bilood oo ka bilaabmata maalinta heshiiska ay saxeexaan.

Qodobka 20aad: Wadashaqeynta KDQ iyo Guddida

1. Guddida Illaalinta Habsami-u-socodka Diiwaangelinta way u madaxbaanaaneysaa hawlahooda shaqo, iyagoo marwalba la-tashi la yeelanaya KDQ.
2. Wixii tallaabo anshax marineed ah ee ay Guddidu soo jeediso waxay u gudbineynsaa KDQ si loo fuliyo.
3. Xisbiyada Siyaasadda waa in ay wada shaqayn iyo gacanba siiyaan Guddida Illaalinta Habsami-u-socodka Diiwaangelinta. Waana in ay ku taageeraan shaqadooda.

Qaybta Sadexaad:

**Qodobka 21^{aad}: Aasaaska Guddi Hawleedka
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee Heer Gobol
“Regional Operation Team (ROT)”**

1. Waxaa qodobkan lagu aasaasay Guddi Hawleedka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee heer gobol oo ka kooban xubnahan hoos ku qoran:
 - a. Xubin ka tirsan Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
 - b. Guddoomiyaha Komishanka ee heer gobol.
 - c. Guddomiyayaasha Komishanka ee heer degmo.
 - d. Xubin/no ka tirsan shaqaalaha Komishanka ee heer qaran.
2. Gobol kasta oo ka tirsan lixda gobol ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa ka hawl galaaya mudadda ay socoto diiwaangelinta codbixiyayaashu guddi hawleed, ka masuul ah taabbo gelinta diiwaangelinta codbixiyayaasha ee gobolka, iyagoo mar kasta la tashanaaya Komishanka.

Qodobka 22^{aad}: Ujeeddada Guddi Hawleedka

Ujeeddada Guddi Hawleedku waa:

- a) Taabbo gelinta iyo ka midho dhalinta qorshayaasha Komishanka.
- b) Fulinta siyaasadaha iyo qorshayaasha Komishanka ee ku wajahan diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- c) La socodsiinta iyo uga warbixinta Komishanka habka ay u socoto Diiwaangelintu.

Qodobka 23^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddi Hawleedka

Xilka iyo waajibaadka Guddi Hawleedku waa:

1. Fulinta siyaasaddaha iyo qorshayaasha Komishanka.
2. Fulinta hawl-maalmeedka Komishanka ee ku wajahandiiwaangelinta codbixiyayaasha.
3. La socodsiinta iyo uga warbixinta Komishanka habka ay u socoto Diiwaangelinta Codbixiyayaashu gobolkaasi.
4. La socodsiinta iyo uga warbixinta Komishanka caqabadaha farsammo ee soo foodsaari kara hawsha diiwaangelinta iyo soo jeedinta talooyinkooda la xidhiidha xalinta caqabadaha.
5. Kulanadda iyo xidhiihinta xubnaha Guddi hawleedka waxa ka masuul noqon doona Xubinta Komishanka.

Qaybta AFRAAAD

Qodobka 24^{aad}: Hawl-wadeenada Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Iyadoo aan waxba loo dhimayn arrimaha ay tilmaamayaan Qodobadda 33^{aad} ee Xeerka ee ku saabsan hawladeenada, waxa Komishanka ku waajib ah:
 - a) In si qoto dheer u hubiyaan hawl-wadeenadda ay ku aaminayaan masuuliyadda culus ee diiwaangelinta codbixiyayaasha inay yihiin kuwa xilkas ah oo gudan kara hawsha loo xilsaaray.
 - b) In ay u tababaraan hawsha diiwaangelinta, isla markaana hubiyaan inay si hufan hawshoodda u gudan karaan, inta ka horaysa maalinta diiwaangelinta codbixiyayaasha.
 - c) In Komishanku u diyaariyo gaadiidka shaqo oo lagu fulin karo hawsha iyo isgaadhsiin.
 - d) Komishanku waxay awood u leeyihiin inay kordhiyaan tirada hawl-wadeenadda goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha, degmadda iyo gobolka, haddii baahidaasi u muuqato.
 - e) Hawlwadeenadda goobaha diiwaangelinta codbixinta, waxay mudada shaqadoodu ku dhamaanaysaa marka uu dhamaado heshiiska uu

Komishanku la galay, hasayeeshee Komishanku wuu kordhin ama yarayn karaa mudadda shaqada intii uu u baahdo.

- f) Komishanku waxa ay awood u leeyihii in ay shaqadda ka joojin karaan, eryi karaan, ama bedeli karaan hawl-wadeenadda ay u arkaan in aanay ku habooneyn fulinta shaqada loo igmaday.

Qodobka 25^{aad}: Gunnada Hawl-wadeenadda

Gunnooyinka ay qaadanayaan hawl-wadeenadda xafiisyada diiwaangelintu waxa qorshaynaya Komishanka, iyagoo ku salaynaya xilalka hawl-wadeenadu ku kala magacaaban yihiin.

Qodobka 26^{aad}: Hawl-wadeenada Goboladda iyo Degmooyinka ee Komishanka


1. Komishanku waxa uu shaqaalayn doonaa Hawl-wadeenadda Gobolka iyo Degmadda ee diiwaangelinta.
2. Hawl-wadeenadda uu Komishanku u qaato goboladda iyo degmooyinka waxa uu la geli doonaa heshiis muddo cayiman ah, kaas oo uu awood Komishanku u leeyahay in uu kordhiyo ama dhimo muddada heshiiska.
3. Heshiiska lala galo hawl-wadeenadda sare ku xusani waxa lagu cayimi doonaa xilka iyo waajibaadka, hawl-wadeen kasta oo gobol ama degmo.
4. Waxa ka reeban shaqaalaha Komishanka ee gobolka ama degmadda in ay ka mid noqdaan:
 - i. Qof aan muwaadin ahayn;
 - ii. Qof xiskiisu dhiman yahay;
 - iii. Xubnaha xisbiyadda qaranka;
 - iv. Xubnaha golayaasha qaranka;
 - v. Shaqaalaha dawladda;
 - vi. Ciidamadda qaranka;
5. Shuruudaha kale waxa ay kala mid yihiin, shuruudaha guddoomiyayaasha xafiisyadda gobolka iyo degmadda ee Doorashooyinka.

Qodobka 27^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka

1. waxa uu maamuli doonaa xafiiska Diiwaangelinta ee Gobolka;
2. waxa uu Komishanka ka caawin doonaa shaqaaleysiinta, tababarka, iyo in uu goob kasta oo diwaangelineed geeyo hawladeenada muhimka ah ee ka hawlgalaya;
3. waxa uu hagi doonaa hawl-maalmeedka xafiiskadiiwaangelinta ee gobolka;
4. Waxa uu dusha ka eegi doonaa hawl-qabadka xafiiska diiwaangelinta ee heer degmo.
5. Waxa uu si dhaw ula shaqayn doonaa xafiiska diiwaangelinta ee heer degmo.
6. Waxa uu Komishanka ka caawin doonaa qiimeynta xaaladaha ku haboonaanta goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha;
7. Waxa uu ka caawin doonaa Komishanka goobaha tababarka shaqaalahaa diiwaangelinta;
8. Waxa uu hubin doonaa in warbixinta bilaha ah iyo kuwa mudaalahaa ahba wakhtigii loogu talo-galay loogu gudbiyo Xarunta Guud ee Komishanka;
9. Waxa uu warbixin mudaale ah ka diyaarin doonaa xafiiska diiwaangelinta ee heer gobol.
10. Waxa uu xidhiidh shaqo la yeelan doonaa wakiillada axsaabta qaranka ee gobolka iyo madaxda gobolkaba;
11. Waxa uu gudan doonaa waajibaadyada kale ee ku xusan Xeerka Doorashada Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001) iyo Xeer nidaamiyahani, iyo heshiiska Komishanku la galo.

Qodobka 28^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Gobolka

1. Waxa uumaamul ahaan ka hoos shaqaynaya Guddoomiyaha Gobolka ee Komishanka.
2. Waxa uu si gaar ah ula shaqayn doonaa maamulka lacagta ee Xarunta Komishanka si loo hubiyo in



- wakhtigii loogu talo-galay la bixiyo lacagta gobolka ee loogu talo-galay hawsha diiwaangelinta;
3. Waxa uu hubin doona in habraacyadda maaliyadeed si buuxda loo raaco;
 4. Waxa uu diyaarin doonaa xisaab xidh dhamays tiran oo bil kasta ah waana in uu u gudbiyo Xarunta Guud ee Komishanka bil kasta dhamaadkeeda;
 5. Waxa uu hayn doonaa kharashaadka yar-yar ee loogu talo-galay xafiiska;
 6. waxa uu samayn doonaa dalabka isla markaana ka masuul noqon doonaa qalabka diiwaangelinta looga baahan yahay, ka la isticmaalayo iyo kuwa la dalbayaba;
 7. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galoo.

Qodobka 29aad: Xilka iyo Waajibaadka Gudoomiye-ku-xigeenka Gobolka

1. Waxa uu ka caawin doonaa Guddoomiyaha in uu hubiyo in xafiiska diiwaangelinta ee heer gobol hawshiisu u socoto si hufan hawl kastaana wakhtigii loogu talo galay ku dhamaato.
2. Waxa uu Komishanka ka caawin doonaa dhamaan hawlaha ujeedadoodu tahay in la dhamays tiro diiwaangelinta codbixiyayaasha ee gobolka ee ay qabanayaan gudoomiyayaasha degmooyinka ee Komishanku;
3. Waxa uu qaban doonaa xil kasta oo kale oo ay u igmadaan Komshanku ama Guddoomiyaha Gobolku;
4. Waxa uu buixin doonaa Jagadda Guddoomiyaha xaaladaha Guddoomiyuhu shaqadda ka tago, xanuunsado, is-casilo, maqnaado, ama geeriyyodo;
5. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha


Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001),
Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

**Qodobka 30^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Xidhiidhiyaha
Gobolka (Coordinator)**

1. Waxa uu kormeer ku sameyn doonaa goobaha diiwaangelinta ee gobolka;
2. Waxa uu ka caawin doonaa Guddoomiyaha Gobolka qiimeynta ku haboonaanta iyo xaaladaha goobaha diiwaangelinta codbixinta ee gobolka;
3. Waxa uu si gaar ah ula shaqayn doonaa shaqaalaha gobolka ee Komishanka;
4. Waxa uu qaban doonaa hawl kasta oo kale oo Guddoomiyuhu ama Komishanku u xil saaro;
5. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

**Qodobka 31^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha
Degmadda.**

1. Waxa uu maamuli doonaa Xafiiska Diiwaangelinta ee heer degmo.
2. Waxa uu ka masuul yahay shaqaalaysiinta xogururiyayaasha goobaha codbixinta ee heer degmo.
3. Waxa uu xidhiidh shaqo la yeelan doonaa xafiiska diiwaangelinta ee heer Gobol.
4. Waxa uu Komishanka ka caawin doonaa qiimeynta xaaladaha iyo ku haboonaanta Goobaha diiwaangelinta ee degmadda.
5. Waxa uu ka caawin doonaa Komishanka kireynta goobaha lagu tababarayo shaqaalaha diiwaangelinta ee degmadda.
6. Waxa uu hubin doonaa in warbixin xisaabeed bil kasta ah iyo kuwo muddaale ahba la diyaariyo una gudbiyo Komishanka.
7. Waxa uu warbin mudaale ah ka diyaarin doonaa hawl-qabadyadda diiwaangelinta ee ka dhacaya xafiisyada diiwaangelinta ee degmadda.

- 
8. Waxa uu xidhiidh shaqo oo dhaw la yeelan doonaa wakiilladda Axsaabta ee degmadda iyo maamulka degmadaba.
 9. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

Qodobka 32aad: Xilka iyo Waajibaadka Xoghayaha Degmadda

1. Waxa uu maamull ahaan hoos imaan doona Guddoomiyaha Degmadda.
2. Waxa uu Guddoomiyaha ka caawin doonaa shaqaaleysiinta iyo kala saarida xogururiyayaasha;
3. Waxa uu si gaar ah ula shaqayn doonaa maamulka maaliyadda si uu u hubiyo in lacagta diiwaangelinta loogu talo-galay loo adeegsaday sidii loogu qorsheeyey;
4. Waxa uu hubin doonaa habraacyadda maaliyaddeed sidoodii loo fuliyey;
5. Waxa uu diyaarin doonaa xisaab xidh dhamays tiran oo bil kasta ahwaana in uu u gudbiyo Xarunta Guud ee Komishanka bil kasta dhamaadkeeda;
6. Waxa uu gaar ahaan uga masuul yahay in uu ilaaliyo lacagta kharashaadka yar-yar ee xafiiska loogu talo-galay (petty cash);
7. waxa uu samayn doonaa dalabka isla markaana ka masuul noqon doonaa qalabka diiwaangelinta looga baahan yahay, ka la isticmaalayo iyo kuwa la dalbayaba;
8. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

Qodobka 33^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Tiriyaha Xafiiska Degmadda

1. Waa xubin ka mid ah xafiiska diiwaangelinta ee heer degmo;
2. Waxa uu Guddoomiyaha Degmadda iyo shaqaalaha kale ka caawin doonaa in ay xilkooda gutaan;
3. Waxa uu ka qayb-qaadan doonaa hawlaha diiwaangelinta codbixiyayaasha ee xafiiska degmadda ka dhacaya;
4. Waxa uu ka caawin doonaa Guddoomiyaha in si hufan loo maamulo xafiiska degmadda;
5. Waxa uu ka caawin doonaa hawl kasta oo kale oo uu xilsaaro Guddoomiyuhu.
6. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

Qodobka 34^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Hubiyaha Degmadda

1. Waxa uu Guddoomiyaha ka caawin doonaa in uu si hufan u guto maamulka xafiiska degmadda;
2. Waxa uu yeelan doonaa doorka hubiye ee hawsha diiwaangelinta;
3. Waxa uu Guddoomiyaha ka caawin doonaa wakhtiga tirinta foomamka diiwaangelinta codbixiyayaasha;
4. Hubiyuhu waxa uu qaban doonaa hawl kasta oo kale oo uu u xil saaro Guddoomiyaha Degmaddu;
5. Waxa uu gudan doonaa xilka iyo waajibaadka kale ee ku xusan Xeerka Doorashadda Golayaasha Deegaanka iyo Madaxtooyadda (Xeer Lr. 20/2001), Xeer Nidaamiyahani, iyo heshiiska lala galo.

Qodobka 35^{aad}: Dhaarta Hawl-wadeenadda Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

Xubnaha loo magacaabay goobaha diiwaangelinta degmada iyo gobolka waxa dhaarinaya guddoomiyaha Maxkamadda Degmadda (dhaar fagaare), dhaartaas oo noqonaysa sidan:

**“WAXA IGU WALAAHIYA OO IGU BILAAHIYA INAAN
HAWSHA DIIWAANGELINTA U GUDAN DOONO SI
XILKASNIMO IYO DAACADNIMO LEH, SHARCIGA IYO
CADAALADDANA AAN KU SHAQAYNAYO”**



**Qodobka 36^{aad}: Hawl-Wadeenadda ka hawl galaaya
Goobaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

1. Hawl-wadeenadda Komishanka ee Diiwaangelinta codbixiyayaasha ee goobta diiwaangelinta ka hawlgalayaa waa saddex qof oo kala ah:
 - a) Guddoomiye Goobeed (Supervisor);
 - b) Xog-ururiye;
 - c) Xog-geliye.
2. Hawl-wadeenadda sare ku xusan waxa caawin doona ciidamada amaanka iyo wakiilka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
3. Komishanku waxa ay awood u leeyahay in uu kordhiyo ama yareeyo tiradda hawl-wadeenada iyaga oo ku salaynaya kolba baahida jirta.
4. Guddoomiyaha, xog-ururiyaha, iyo xog-galiyaha waxaa magacaabaya Komishanka, waxaanu samayn karaa isku bedelid haddii loo baahdo.

**Qodobka 37^{aad}: Shuruudaha laga rabo Hawl-
wadeenadda Goobaha Diiwaangelinta:**

1. Shuruudaha lagu qaadanayo hawl-wadeenada Komishanka ee ka hawlgalaya goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha waxa ka mid ah:
 - a) Waa in uu yahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyada Somaliland;
 - b) Waa in xiskiisu dhan yahay;
 - c) Waa in aanu xubin ka ahayn Golayaasha Qaranka JSL;
 - d) Waa in aanu xubin ka ahayn xisbiyadda qaranka;
 - e) Waa in aanu ahayn shaqaale dawladeed, marka laga reebo macalimiinta;
 - f) Waa in uu yahay qof masuula oo gudan kara hawsha diiwaangelinta;

- g) Waa in uu ku sifoobaa karti, daacadnimo iyo aaminaad, Bulshada dhexdeedana sumeadda ku leeyahay.
- h) Waa in uu sitaa shahaado jaamacadeed ama yahay arday dhigta jaamacadda ama wax u dhigma heystaa;
- i) Waa in uu aqoon fiican u leeyahay kuna shaqayn karaa Kombiyutarka iyo aaladaha casriga ah, marka laga reebo Xog-ururiyaha;
- j) Waa in aan xukun ciqaab ah oo kama danbeys ahi ku dhicin saddexdii sanno ee ugu dambeeyey;
- k) Waa in uu/ay u hogaansamaa/taa shuruucda iyo Xeerka Diiwaangelinta.

Qodobka 38^{aad}: Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Goobta:

1. Guddoomiyaha Goobta Diiwaangelintu waxa uu masuul ka noqon doonaa hawl-maalmeedka goobta diiwaangelinta;
2. Waxa uu furi doonaa isla markaana xidhi doonaa, goobta diiwaangelinta maalin kasta oo shaqo, isaga oo raacaya Xeerka iyo Xeer-nidaamiyahan;
3. Waxa uu si gaar ah uga masuul yahay agabka iyo qalabka loo adeegsado diiwaangelinta codbixiyayaasha;
4. Guddoomiyuhu waxa uu ilaalin doonaa kala danbeynta goobta diiwaangelinta isaga oo adeegsanaya ciidamada amaanka, waxanu ka go'aan gaadhi doonaa tiradda is-diiwaangeliyayaasha ah ee loo oggolaan karo hal mar in ay soo galaan goobta diiwaangelinta, marka laga reebo hawl-wadeenadda diiwaangelinta, wakiillada axsaabta, goob-joogayaasha, iyo cida kale oo Komishankuu ogolaaddo.
5. Guddoomiyahagoobtu waxa uu ciidamadda amaanka ku amri karaa in la qabto qof kasta oo ay ku caddaato in uu isku deyey in uu hal mar wax ka badan is-diiwaangesho, ciidamadda amaanku waa in ay sida ugu dhakhsaha badan ugu wareejyaan saldhiga ugu

dhow si loogu oogo ciqaabta uu mutaystay ee ku xusan Qoddobka 44^{aad} ee Xeerka.

6. Guddoomiyaha Goobta diiwaangelintu waxa uu ku amri doonaa qof kasta kuwaas oo ay ku jiraan wakiillada axsaabta, goob-joogayaasha, iyo saxaafada, oo ku gafa Xeer nidaamiyahan ama khalkhal galiya habsami u socodka hawsha diiwaangelinta, in laga saaro goobta diiwaangelinta, ama safka,
7. Qof kasta oo diida in uu qaato amarka ciidamadda amaanku waxa uu galay danbi waxana talaabo sharciga waafaqsan ka qaadi doona ciidamadda amaanka;
8. Guddoomiyaha goobtu waxa uu qaadi doonaa talaabo kasta oo uu arko in ay lagama maarmaan u tahay amaanka qof kasta oo ku sugar goobta diiwaangelinta si uu uga hortago in rabshad ama dhibaato ka dhacdo goobta diiwaangelinta.
9. Awoodaha sare ku xusan sinaba looguma adeegsan karo in qof muwaadin ah oo buuxiyey shuruudaha diiwaangelinta loo diido in uu is-diiwaangesho.

Qodobka 39^{aad}: Xilka Xog-geliyaha (Operator):

1. Xog-geliyuhu waxa uu masuul ka yahay gelinta kombiyutarka macluumaadka ku qoran foomka diiwaangelinta codbixiyayaasha; Qaadida astaamaha indhaha (iris) iyo sawirka qofka.
2. Marka uu qofka diiwaangeliyo waxa uu siin doonaa cadaynta is-diiwaangelinta (certificate of registration).

Qodobka 40^{aad}: Xilka Xog-Ururiyaha (Interviewer):

1. Xog-ururiyuhu waxa uu qaadi doonaa waraysiga qofka waxanu galin doonaa foomka diiwaangelinta codbixiyaha;
2. Waxa uu buuxin doonaa foomka diiwaangelinta codbixiyayaha.
3. Marka uu buuxiyo foomka diiwaagelinta codbixiyaha waa in uu hubsadaa in magaca iyo macluumaadka kale ay sax yihiin una akhriyaa qofka is-diiwaangelinaya kana hubiyaa.

Qodobka 41aad: Shaqaalaha Amniga

1. Saraakiisha Booliska ee goobta ilaalinaya waxa ay u xilsaaran yihiin in ay ilaaliyaan amaanka goobta diiwaangelinta, hagaajinta safafka, iyo qabashada qof kasta oo isku daya in uu laba jeer is-diiwaangeliyo.
2. Wuxuu ay ilaalin doonaan dhawridda iyo xafidaadda amniga agabkadiiwaangelinta iyo hawl-wadeennadaba.
3. Ciidamada amaanka ee goobta ka shaqaynaya waxa ay gudaha usoo gali karaan goobta haddii uu ka codsado sidaasi Guddoomiyaha goobtu, waxa ay amarka ka qaadan doonaan Guddoomiyaha goobta diiwaangelinta codbixinta.
4. Haddii ay u muuqato khatar dhab ahi in ay ku soo fool leedahay hawl-wadeennada diiwaangelinta, ama dadka isdiiwaangalinayaba, shaqaalaha amnigu waxa ay amri doonaan dadka safka ku jira in ay kala dareeraan, goobtana la xidho, ilaa khatartaasi wax laga qabanayo/laga suulinayo iyaga oo kala tashanaya Guddoomiyaha Goobta arintaasi.
5. Guddoomiyaha Goobtu waa in uu sida uga dhakhsaha badan ku war-galiyaa xafiiska Komishanka ee Degmadda/Gobolka iyo Komishankaba.

Qodobka 42aad: Doorka Shaqo ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha

1. Doorka shaqo ee ay Wasaaradda Arrimaha Guduuhu ku yeelanayso geedi-socodka diiwaangelinta codbixiyeyaashu waxa uu noqonayaa in ay Wasaaraddu sugto muwaaddinnimada dadka raba in ay isku diiwaangeliyaan codbixiye ahaan ee aan sidan kaadhka aqoonsiga.
2. Goob kasta oo diwaangelineed waa in Wasaaraddu soo dirtaa wakiil ka socda oo xaqijiya muwaadinimada is-diiwaangeliyayaasha aan sidan kaadhka aqoonsiga muwaadinka.

Qodobka 43aad: Sugitaanka Muwaadinka

1. Qofka aan sidan kaadhka aqoonsiga muwaadinka, waxa xaqijin doona wakiil ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
2. Wakiilka Wasaaraddu waa in uu ku qancaa in qofka is-diwaangelinayaayahay muwaadin u dhashay Jamhuuriyada Somaliland si waafaqsan Xeerka.
3. Haddii uu ku qanci waayo in uu yahay muwaadin waxa uu ka codsan doonaa in uu keeno qof laga yaqaano deegaanka sida: Suldaan, caaqil, xubnaha labada Gole baarlamaan, golayaasha deegaanka, imaanka tuulada, ganacsade deegaanka ka mid ah.
4. Qofku in uu muwaadin yahay waxa kale oo cadayn karaa Baasaaborka Somaliland, aqoonsiga ay bixiyaan dawladaha hoose, warqadaha dhalashada oo ay bixisay Somaliland.

Qodobka 44aad: Xaqijinta Da'da Codbixiyaha

1. Da'da muwaadinka waxa lagu jaangoynayaa da'da muwaadinka ee ku qoran warqadda aqoonsiga.
2. Muwaadinka aan sidan warqadda aqoonsiga, da'diisa waxa lagu cadayn karaa waraaqaha kale ee aqoonsiga, sida waraaqaha aqoonsiga, baasaaborka, oo muujinaya da'da dhalashada ee qofka.
3. Haddii Diwaangeliyuuhu aanu hubin ama mugdi ka galo da'da muwaadinku in uu gaadhay da'dii diiwaangelinta doorashada waxa la waydiinayaa oo la qaadanaya da'da uu sheego Waalidkii, haddii la waayana waxa go'aan ka gaadhaya Guddoomiyaha Goobta.
4. Haddii uu muwaadinku yahay mid aan gaadhin da'da diiwaangelinta xilliga diiwaangelinta, balse uu gaadhayo da'da doorashada wakhtiga doorashada, qofkaasi waa la diiwaangelinayaay.


Qaybta Shanaad

Qodobka 45^{aad}: Wakiiladda Axsaabta

1. Saddexda xisbi qaran waxa ay u soo diran karaan goob kasta oo diiwaangelin ka dhacayso min hal wakiil. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkooda haddii ay maqnaadaan.
2. Wakiillada ay axsaabtu soo dirsadaan waa inay ku sugnaadaan goobahooda xilliyada hawsha diiwaangelintu socoto, soona jeediyaa wixii tabasho ama cabasho ah ee ay qabaan haddii ay jirto.
3. Magacyada wakiilada xisbiyadda waa in loo geeyo xafiisyadda Komishanka 10 maalmood ka hor taariikhda diiwaangelinta ee gobolka.
4. Komishanka wuxuu siinayaan wakiil kasta aqoonsi ama qoraal ogolaansho ah oo u fasaxaya inuu ka hawl geli karo goobta diiwaangelinta ee loo soo diray.
5. Wakiil kasta oo xisbi waa in uu mar walba sitaa kaadhkiisa aqoonsiga ee ay siiyeen Komishanku, wakiilkka aan sidan kaadhka aqoonsigu waxa uu lumin doonaa xaqa in uu galo goobta diiwaangelinta codbixiyayaasha;
6. Wakiil kasta oo xisbi waa in uu ku dhaqmaa Xeerka Anshaxa Xisbiyada Siyaasada, iyo shuruucda diiwaangelinta ee dhaqan galka ah.
7. Xisbiyadu waxa kaliya oo ay soo badalan karaan wakiiladooda haddii uu qoraal codsi ah u diro Komishanka lagana aqbalo.
8. Xisbigu waa in uu qoraalkiisa raaciyyaa sababta uu u badalayo wakiilkiisa iyo tafaasiisha cida uu ku bedelayo.
9. Meelaha aanay suurtogal ahayn in la helo qoraalka bedelka, Komishanka ayaa goobta kaga go'aan gaadhi doona.

Qodobka 46^{aad}: Waajibaadka iyo Masuuliyadda Wakiillada Axsaabta Siyaasadda

1. Wakiilada axsaabtu waxa ay hubinayaan in geedi-socodka diiwaangelintu waafaqsanyahay sharciga, waxana ay u kuurgali doonaan hawsha diiwaangelinta ee ay wadaan hawladeenadda diiwaangelintu ee goobta uu ka hawlgalayo/so.

- 
2. Wakiillada asxaabtu ma faro-gelin karaan mana carqaladayn karaan hawsha diiwangelinta ee socota;
 3. Haddii wakiillada axsaabtu ku gafaan Xeerka Anshaxa, Guddoomiyaha Goobtu waxa tuu awood u leeyahay in uu ka saaro goobta, waxamu sida ugu dhakhsaha badan u ogaysiin doonaa Komishanka.
 4. Wakiillada asxaabtu waxa ay buuxin karaan foomamka cabashada haddii ay arkaan mid ka mid ah ama dhamaan xaaladahan soo socda:
 - a) Haddii la diiwaangeliyo dad aan gaadhin da'dii diiwaangelinta si waafaqsan Xeerka Diiwaaangelinta Codbixiyayaasha;
 - b) Haddii la diiwaangeliyo dad aan u dhalan Jamhuuriyadda Somaliland;
 - c) Haddii loo diido in la diiwaangeliyo dad buuxiyey shuruudihii diiwaangelinta.
 - d) Haddii la kala takooro dadka isdiiwaangelinaya.
 - e) Haddii la cabsi geliyo dadka is-diiwaangelinaya.
 - f) Haddii aan lagu dhaqmin Xeerka ama/ayo Xeer nidaamiyaha Diiwaangelinta codbixiyayaasha;
 - g) Haddii aan goobta diiwaangelinta la furin ama aanay wax shaqo ahi ka socon sabab la'aan, xiliyada shaqadda.
 5. Cabashooyinka ay soo jeediyaaan Wakiillada axsaabtu waa in la soo gaadhsiiyaa Guiddida Xalinta Cabashooyinka sida ugu dhakhsaha badan oon ka badneyn muddo dhan laba cisho.
 6. Wakiillada axsaabtu ma soo bandhigi karaan qoraal, calaamad, kaadh, ama qaab kale oo muujinaya in ay wakiillo ka yihiin xisbi gaar ah, kamana dhex ololeyn karaan goobta diiwaangelinta iyo agagaarkeedaba.
 7. Wakiillada asxaabtu waxa ay shaqada soo galin doonaan waqtiga goobta la furo waxaaney ka bixi doonaan marka la xidhayo goobta.

Qodobka 47aad: Shuruudaha Wakiilka Xisbiga

Wakiillada xisbiyaddu u soo magacaabaan goobaha diiwaangelinta waa inay buuxiyaan shuruudahan:



1. Waa inuu yahay muwaadin Somaliland u dhashay.
2. Waa in aan da' diisu ka yarayn 25 sano sanadka diiwaangelinta codbixiyayaashu dhacayso.
3. Waa in aanu xubin ka ahayn Golayaasha Qaranka iyo Golayaasha Degaanka.
4. Waa inuu wax qori karo waxna akhriyi karo.
5. Waa inuu yahay qof xilkas ah oo dhaqan toosan.

Qodobka 48^{aad}: Kormeerayaasha Caalamiga ah iyo kuwa Wadaniga ah

1. Kormeerayaasha uu ogolaaday Komishanku waxa ay kormeeri karaan hawsha diiwaangelinta ee ka socota goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha, kormeerayaasha waxa ay ku dhaqmi doonaan Xeerka Anshaxa.
2. Komishanku waxa uu siin doonaa kormeerayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah kaadh aqoonsi, kadib marka ay buuxiyaan foomamka ogolaanshaha, isla markaana saxeexaan Xeerka Anshaxa.
3. Kormeerayaasha caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ahiba waa in ay sitaan kaadhkooda aqoonsi, mar kasta oo ay gudanayaan shaqadoda.

Qodobka 49^{aad}: Saxaafadda Maxaliga ah iyo Ta Caalamiga ah

1. Saxaafada maxaliga ah iyo ta caalamiga ahi waxa ay la socon karaan, isla markaana baahin karaan habsami u socodka diiwaangelinta codbixiyayaasha.
2. Saxaafada la ogolaaday waxa ay gali karaan goobaha diiwaangelinta, waqtiyadda caadiga ah ee shaqadu socoto, hasayeeshee ma carqaladayn karaan, ama ma hor-istaagi karaan hawsha diiwaangelinta ee goobta ka socota.
3. Saxaafaddu waxa ay ku dhaqmi doonaan Xeerka Anshaxa saxaafada, ee diiwaangelinta codbixiyayaasha, waxaanay mar walba sidan doonaan kaadh aqoonsi oo muujinaya halka ay ka socdaan.

**Qodobka 50^{aad}: Tababarka Hawl-wadeenada
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

1. Komishanku waa inuu siyaa tababar dhammaan hawl-wadeenadda diiwaangelinta Codbixiyayaasha si hawshooda ugu gutaan si xilkasnimo leh.
2. Hawl-wadeenada Diiwaangelinta Codbixiyayaashu waa inay u gutaan shaqadooda si ay ku jirto daacadnimmo, kalsoonni, caddaalad, waddaninimo, hubsiimo iyo hufnaan.

Qodobka 51^{aad}: Ilaalinta xogta Diiwaangelinta

1. Dhammaan hawl-wadeenadda diiwaangelinta codbixiyayaasha waxa ku waajib ah inay ilaaliyaan sirta xafiiska iyo xogta diiwaangelinta;
2. Qof kasta oo bixiya xogta diiwaangelinta ama si kalaba uga faa'iidaysta waxa uu galay danbi waxaana lagu qaadi doonaa si waafaqsan Xeerka Ciqaabta Guud.
3. Waajibnimadda ilaalinta xogta diiwaangelintu waxa ay dhaqangal ahaan doontaa xitaa marka ay dhamaato hawsha diiwaangelintu ama heshiiska qofka lala galayba.

**Cutubka saddexaad: Agabka Diiwaangelinta
Codbixiyayaasha
Qaybta Koowaad:**

**Qodobka 52^{aad}: Qalabka/Agabka Xafisyyada
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**

1. Komishanku waxa uu goobaha diiwaangelinta codbixinta u diyaarin doona, agabka loo baahan yahay si loogu fuliyo hawsha diiwaangelinta.
2. Komishanku waa in qalabka diiwaangelinta ku diro wakhti ku haboon, iyadoo ay la socdaan computeradii (kit/s) waxa lagu diiwaangelinayay oo leh lambar goob kasta u gaar ah, si loo gaadhsiyo goobta diiwaangelinta codbixinta.
3. Dhamaan agabka iyo qalabka kala duwan ee loo isticmaalayo diiwaangelinta codbixiyaha waa in si adag loo xafido, lana diiwaangeliyo goob kasta oo uu

ku sugaran yahay iyadoo lagu soo xereynayo goobaha
Komishanku u cayimo ee degmo/gobol.

4. Komishanku waxa geyn doonaa goobaha
diwaangelinta codbixinta agabka loo baaahan yahay
wakhti ku munaasib ah.

Qodobka 53^{aad}: Diyaarinta Goobaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Marka la qabanayo Diiwaangelinta codbixiyayaasha,
waxa dalka loo qaybinayaa goobo diiwaangelineed
iyadda oo la waafajinayo lixda gobol ee dalku u
qaybsanyahay.
2. Komishanka ayaa ku dhawaaqaya goobaha
diwaangelinta codbixiyayaasha ee loo cayimay
gobol/degmo kasta.
3. Goobihii codbixeeneed ee doorashadii u dambaysay,
waxay noqonayaan goobo diiwaangelineed.
Haseyeeshee Komishanku wuxuu awood u leeyahay
in uu sammeeyo goobo cusub ama in uu goobihii hore
u jiray u raro (beddelo) meelo kale si loo dedejiyo
geedi-socodka diiwaangelinta.
4. Komishanku waxa uu sameyn karaa goobo
diiwaangelineed oo Gobol/degmoo cusub ka hor
maalinta diiwaangelinta codbixiyayaasha ee
gobolkaasi.
5. Goobaha diiwaangelinta ee dalku waxa ay ku cad
yihiin Lifaaqa Koowaad.
6. Komishanku waxa uu dejinayaan nidaam lagu kala
garto goobaha diiwaangelinta, iyada oo uu siinaayo
goob kasta oo diiwaangalineed tirsi lambar (code) oo
gaar u ah.

Qodobka 54^{aad}: Nidaamka Goobta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Goobta diiwaangelinta waxa geli kara hawl-
wadeenadda Komishanka, is-diiwaangeliyayaasha
wakiillada axsaabta, goob-joogayaasha iyo saxaafada
la ogolaaday.



2. Ma banaana in hub lala yimaado goobta diiwaangelinta, marka laga reebo ciidanka amniga ee goobta ka shaqaynaya.
3. Is-diiwaangeliyayaashu waxay isu taagayaan safaf, tirada geli karta goobta hal mar waxa go'aaminaya Guddoomiyaha goobta.
4. Waxa loo kala hor marin doonaa sidii loo soo kala horeeyey, hasayeeshee waa la tixgelin karaa inuu ugu hormaro haddii ay jirto xaalad gaar ah sida: qof naafo ah, waayeelka, hooyo nuujinasa ama uur leh, qof xanuusanaya ama jilicsanama qof ka shaqaynaya hawsha diiwaangelinta oo doonaya inuu is-diiwaangeliyo.

Qodobka 55^{aad}: Wakhtiga Hawlgalka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Hawlgalka diiwaangelinta waxa ay bilaabmaysa 6:00 subaxnimo kuna dhamaanaysa 6:00 fiidnimo. Hasayeeshee, hawl-wadeenadda diiwaangelintu iyo wakiillada axsaabta waxa ku waajib ah inay goobahooda shaqo ku sugnaadaan ugu yaraan nusasaace ka hor wakhtiga diiwaangelintu bilaabmayso.
2. Diiwaangelintu way soconaysaa, haddii ay jiraan is-diiwaangeliyayaal safka ku jira oo aan welli la diiwaangelin ilaa ay ka dhamaanayaan is-diiwaangeliyayaasha markaas safka taagan.
3. Ciidamada amniga waxa waajib ku ah in ay safka qofka ugu danbeeya ee ku jira waqtiga xidhitaanka calaamadiyaan, isla markaana aanay u ogolaan dad cusub in ay safka soo galaan.

Qaybta Labaad:

Qodobka 56^{aad}: Foomka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

1. Foomka diiwaangelinta ayaa saldhig u noqonaya diiwaangelinta codbixiyayaasha, Foomka

Diiwaangelinta oo dhammaystiran ayuunbaa xogta qofka ladiiwaangelin karaa.

Foomka Diiwaangelinta waxa lagu qorayaan xogaha hoos ku qoran ee codbixiyaha:-

- 
- a) Magaca codbixiyaha oo afraan una qoran sida uu ugu qoran Warqadda Aqoonsiga, haddii uu sito/sidato.
 - b) Magaca hooyadda oo saddexan;
 - c) Sanadka uu dhashay iyo meesha uu ku dhashay.
 - d) Lab ama dhedig.
 - e) Lambarka telifoonka haddi uu sito/sidato.
 - f) Lambarka warqadda Aqoonsiga (ID Card Number), haddii uu sito/sidato.
 - g) Magaca iyo lambarka gaarka ah ee goobta codbixinta ee uu codkiisa ka dhiibban doono.
 - h) Saxeexa cod-bixiyaha ama tilmaan muujineysa in aanu cod-bixiyuhu saxeexi karayn.
2. Komishanka Doorashooyinku waxa uu awood u leeyahay in uu ku daro foomka Diiwaangelinta xog kasta oo dheeraad ah oo ay u arkaan in ay muhiim u tahay diiwaangelinta.

Qaybta Sadexaad: Habka Diiwaangelinta Codbixinta

Qodobka 57^{aad}: Habka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha

- 1. Is-diiwaangaliyayaashu waa in ay iska diwaangaliyan goobta ay codkooda ka dhiibban doonaan muddada hore ee diiwaangelinta (core period).
- 2. Goobaha magaaloo yinka ah ee la isku raray, waxa uu muwaadinku iska diiwaangelin karaa goobta diiwaangelinta, balse waxa uu dooran karaa goobta kale ee uu ka codaynayo ee mid ah goobahaasi la isku-raray.
- 3. Muddada kaabista ah (residual period), is-diiwaangeliyayaashu waxa ay goobaha degmadda lagu

reebay ka dooran karaan goobta ay ka codaynayaan ee isla goobaha hoos yimaada degmadaasi.

4. Komishanku waxa uu soo saari doonaa habraac (procedures manual) dhamays tiran oo koobsanaya habraacaiyo habsami u socodka diiwaangelinta bilaw ilaa dhamaad.

Cutubka Afraad: Diidmadda iyo Cabashooyinka Qaybta Koowaad

Qodobka 58^{aad}: Diidmada Codsiga Diiwaangelinta

1. Haddii Diwaangeliyuha ama wakiilka Wasaaraddu ku qanci waayo in qofku buuxiyey shuruudihii diiwaangelinta, waxa uu siin doonaa qofka doonaya in uu is-diwaangeliyo ogeysiin diidmo ah isaga oo xusaya sababta keentay diidmadda.
2. Haddii Diwaangeliyuhu arko in is-diwaangeliyuhu goob kale ama isla goobtaasi mar hore iska diwaangeliyay, waxa uu hubin doonaa macluumaadkiisa gaarka ah, waxanu qofka u daabici doonaa cadayn sheegaysa in uu isku dayay in uu hal mar wax ka badan is-diwaangesho, haddii ay ula muuqato in uu qofkaasi ula kac u sameeyay falkaasi waxa uu ku war-galin doonaa in uu danbi galay, waxaanu ku amri doonaa ciidamada amnigu in ay qabtaan.
3. Foomka diidmada is-diwaangeliyaha waxa uu ka koobnaan doonaa saddex nuqul oo leh midabo kala duwan, nuqulka asalka ah waxa la siin doonaa is-diwaangeliyaha la diiday, nuqulka labaad waxa la siin doonaa Xafiiska Degmada/Gobolka, nuqulka u danbeeya waxa uu ku hadhi doonaa buugga waxana loosoo gudbin doonaa Xarunta Guud ee Komishanka.
4. Goob kasta oo diiwaangelineed waa in la geeyaa ugu yaraan hal buug oo foomamka diidmada is-diwaangeliyaha ah.

Qaybta Labaad



Qodobka 59aad: Cabashooyinka ka Dhanka ah Diidmada Codsiga Is-Diiwaangelinta

1. Inta lagu gudo jiro wakhtiga diiwaangelinta, Komishanku waa in uu shaaciyya habka, iyo muddada lagaga caban karo go'aanka diidmada.
2. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka diiwaangeliyaha waxa uu u caban karaa Xafiiska Diiwaangelinta ee heer Degmo muddo aan ka badneyn laba maalmood gudahood, isaga oo sii qaadanaya Foomka diidmada ee ay soo siyeyen hawl-wadeenadda goobtu.
3. Xafiiska Degmadu waa in uu ku qiimeeyaa kagana go'aan gaadhaa cabashooyinka la xidhiidha diidmadda muddo laba cisho gudahood ah kadib marka ay soo gaadhaan.
4. Go'aanka Xafiiska Diiwaangelinta ee heer degmo waa in la gaadhsiiyaa goobta ay khuseyso sida ugu dhakhsaha badan oon ka badnaan karin laba cisho.
5. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka Diiwangelinta Heer Degmo waxa uu cabashadiisau gudbin karaa Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta ee Komishanka Doorashooyinka, isaga oo usii marinaya Xafiiska Degmadda.
6. Xafiiska Degmadu waa in uu Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta ugu gudbiyya cabashada muwaadiniinta sida ugu dhakhsaha badan.
7. Go'aan kasta oo ay soo saaraan Guddida Xalinta Cabashooyinka Diwaangelintu waa mid maamul, waxaana looga rafcaan qaadan karaa maxkamadda awooda u leh.
8. Guddoomiyaha goobtu waa in uu wax ka qabtaa cabasho kasta oo is-diwaangeliyayaashu qabaan oo ku saabsan habsami u socodka hawsha diiwaangelinta goobta.

Cutubka shanaad: Xidhitaanka Goobta Diiwaangelinta

Qaybta Koowaad



Qodobka 60^{aad}: Xidhitaanka Hawsha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha iyo Wareejinta Qalabka/Agabka

1. Markuu Guddoomiyaha goobtu dhameeyo hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha, waa in uu qaadaa xogta is-diiwaangeliyayaasha oo elektarooni ah (backup) waxa uu diyaarinayaa wadarta tirada codbixiyayaasha is-diiwaangeliyay, waxaanu ku ridayaan baqshadaha loogu tala-galay.
2. Guddoomiyaha goobtu waxa kale oo uu gal gaar ah ku ridi doonaa tiradda foomamka xumaaday, iyo diidmooyinka la bixiyey, iyo cadaynta qofka hal mar wax ka badan isku dayay in uu is-diiwaangeliyo.
3. Buqshadaha waa la lingaxayaa, korkana waxa lagaga dhufanayaa shaambaddii goobta, waxaana korka wadajir uga saxeexaya Guddoomiyahagoobta iyo Xog-geliyaha.
4. Buqshadaha korkooda waxa lagu qorayaan faahfaahinta waxa buqshadda gudaheeda ku jira.
5. Guddoomiyaha goobta diiwaangelinta oo ugu yaraan ay la socdaan xubin hawladeenada ka tirsan iyo Boolis ilaalo ah ayaa qaadaya qalabka, qoraalka raadraac iyo buqshadaha goobta kuna wareejinaya xafiiska diiwaangelinta ee Gobolka, muddo aan ka badnayn 12 saacadood marka ay diiwaangelintu dhammaato.
6. Marka xafiiska diiwaangelinta ee Gobolka lagu wareejinayo qalabka iyo buqshadaha waa inuu guddoomiyaha Gobolku bixiyo caddaynta la wareegidda agabkaas.
7. Qalabka diiwaangelinta dib ayaa looga shaqayn doonaa, waxana loodiyaarin doonaa gobolka ku xiga ka diwaangelintiisu dhamaatay.

Cutubka Lixaad: Liistada Hordhaca ah Qaybta Koowaad




Qodobka 61aad: Soo Saarida Liistada Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee Hordhaca ah

1. Komishanku markuu dhamaystiro hawshiisa diiwaangelinta codbixiyayaasha, ee uu ku qanco in diiwaangelintu si habsami ah u dhacday, wuxuu si hordhac ah u soo saarayaa liiska codbixiyayaasha.
2. Liistada codbixiyaasha ee hordhaca ah waxa la diyaarin doonaa goob kasta oo codbixineed. Diiwaanka liistada codbixiyayaasha ee loo diyaariyey goob kasta oo codbixineed waxa ku jiri doonaa lambarka gaarka ah ee codbixiyaha, magaca oo affran, da'da, jinsiga, sawirka qofka, goobta codbixinta.
3. Liistada codbixiyayaasha ee hordhaca ah ah waxa uu Komishanka Doorashooyinku soo dhajin doonaa, kadib marka uu dhamays tiro diiwaangelinta codbixiyayaasha ee dhamaan gobollada isla markaana la shaandheeyo lagana saaro cid kasta oo hal mar wax ka badan is-diiwaangelisay, cabashooyinka jirana wax laga qabto.
4. Komishanku waxa kale oo uu soo dhajin doonaa liistada cid kasta oo hal mar wax ka badan is-diiwaangelisay.
5. Komishanka ayaa ugu danbeyn todobaad ka hor maalinta la soo saarayo liistada diiwaangelinta ee hordhaca ah waxa uu soo saari doonaa ogeysiin dadweyne oo ku saabsan waqtiga iyo goobta lagu soo dhajinayo liistada hordhaca ah ee diiwaangelinta.
6. Komishanku waxa uu adeegsan karaa qaababka kale ee suurtogalka ah si uu usoo bandhigo liistada codbixiyayaasha ee hordhaca ah.


Qaybta Labaad

Qodobka 62aad: Cabashooyinka La Xidhiidha Soo Saarida Liistada Hordhaca ah

- 
1. Marka la soo saaro liistada hordhaca ah ee diiwaangelinta codbixiyayaasha, waxa cabasho sameyn kara oo kaliya qof kasta oo heysta foomka diiwaangelinta codbixiyayaasha (certificate of registration).
 2. Cabashooyinku waxa ay la xidhiidhi karaan mid ka mid ah ama dhamaan arimahan soo socda:
 - a) Goob aan ahayn tii uu u doortey codbixinta oo lagu qorey;
 - b) Diiwaanka oo aanu magaciisu ku jirin;
 3. Qof kasta oo cabanayaa waa in uu buuxiyaa foomka loogu talo-galay cabashooyinka oo ay siin doonaan Komishanka Doorashooyinka ee heer degmo;
 4. Cabashooyinka Axsaabta Qaranku ka qabaan diiwaanka ku-meel gaadhka ah, waa in ay ku soo gudbiyaan 7 casho gudahood, oo ka bilaabmata maalinta la soo saaro diiwaanka ku-meel gaadhka ah, Xisbiyadda siyaasadu waxa ay ka caban karaan haddii ay ku arkaan liistooyinka la soo dhajiyey:
 - a. Dad aan muwaadiniin ahayn oo la diiwaangeliyey;
 - b. Dad aan gaadhin da'dii diiwaangelinta si waafaqsan Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, oo la diiwaangeliyay;
 - c. Dad xaq u lahaa in la diiwaangesho oo loo diiday in ay is-diiwaangeliyan, iyada oo aanay jirin sabab macquula oo loo diiwaangelin kari waayay;

Qodobka 63^{aad}: Foomamka Cabashada

1. Komishanku waa in uu sameeyaa isla markaana geeyaa goob kasta foomamka cabashadda,
2. Foomamka cabashaddu waxa ay ka koobnaan doonaan saddex nuqul leh midabo kala duwan, waana in lagu muujiyaa nuqul kasta cida la siinayo.
3. Foomamka lagu diwaangeliyo cabashooyinka waa in la keenaa xafiisyada heer Gobol ee Komishanka Doorashooyinka si uu uga go'aan gaadho.
4. Haddii xafiiska heer gobol u arko cabashada in aanu waxba ka qaban karin, waxa uu usoo gudbinayaa Guiddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

- 
5. Qof kasta oo ku qanci waaya go'aanka xafiiska heer gobol waxa uu xaq u leeyahay in uu cabashadiisa usoo gudbiyo Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee Komishanka.
 6. Komishanka doorashooyinku waa in ay aasaasaan guddi u gaar ah xalinta cabashooyinkala xidhiidha diiwaangelinta codbixiyayaasha ee maamul.
 7. Go'aanka ay soo saaraan Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaashawaa mid maamul, cid kasta oo ku qanci weydaana waxa ay uga rafcaan qaadan kartaa Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Qodobka 64^{aad}: Muddada La Sameyn Karo Cabasho iyo Rafcaanada

Qof kasta oo ka cabanaya xogta ku qoran liistada hordhaca ah waa in uu cabashadiisa kusoo gudbiyaa muddo todoba cashogudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta la soo saaro liistada hordhaca ah.

Qodobka 65^{aad}: Go'aan ka Gaadhida Cabashooyinka La Xidhiidha Liistada Hordhaca ah

1. Cabashooyinka la xidhiidha liistada diiwaangelintahordhaca ah waxa ka go'aan gaadhi doona Komishanka Doorashooyinka ee heer gobol, kadib marka ay darsaan cabashada, isla markaana eegaan in ay macquul tahay, waxa ay sixitaanka loo baahan yahay ka codsan doonaan Xarunta Dhexe ee Komishanka.
2. Haddii cabashadu khuseyso arimo farsammo, Guddoomiyaha Gobolka ee Komishanku waxa uu usoo gudbdin doonaa Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee maamulsi ay wax uga qabato cabashadaasi.
3. Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee maamulka dib marka ay deristo nooca cabashada waxa ay kasoo saari doontaa go'aan maamul kaas oo lagu xalinayo cabashadda.
4. Cabasho kasta waa in go'aan laga gaadhaa muddo toban (10) casho gudahood ah.

5. Go'aanka waxa la gaadhsiin doonaa laguna dhejin doonaa goobaha lagu dhajiyey liistada hordhaca ah ee codbixiyayaasha.

Qaybta Sadexaad:



**Qodobka 66^{aad}: Guddida Xalinta Cabashooyinka
Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee Maamul**

1. Komishanka Doorashooyinku waxa uu aasaasi doonaa Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee maamuloo ka go'aan gaadha cabashooyinka la xidhiidha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
2. Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee maamulwaxa u xarun u ahXarunta Guud ee Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
3. Guddida Xalinta Cabashooyinka waxa ay kooban tahay lix xubnood oo kala ah:
 - a. Laba xubnood ka tirsan Komishanka Doorashooyinka ee Heer Qaran.
 - b. Lataliyaha arrimaha sharci ee Komishanka.
 - c. Madaxa Waaxda Diiwaangelinta.
 - d. Maxada Waaxda Hawgelinta (operations).
 - e. Waaxda Farsamada (IT)
4. Inta ay socoto Diiwaangelinta Codbixiyayaashu waa in ay xubnaha Guddida Xalinta Cabashooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha ee maamulwaxa ay ka hawlgeli karaan kolba gobolka ay ka socoto diiwaangelinta codbixiyayaashu iyaga oo cabashooyinka soo gaadha sida ugu degdega badan uga jawaab celin doona.

Qaybta Afraad:

**Qodobka 67^{aad}: Diiwaanka Codbixiyayaasha ee
KamaDanbaysta ah**

1. Komishanku kadib marka go'aan uu ka gaadho cabashooyinka, isla markaana la sameeyo wixii sixitaan ah ee la go'aansado, waxa uu soo saari doonaa diiwaanka codbixiyayaasha ee kama

- NATIONAAL GOOCH FEEDER ORGANISATIÖN
- danbaysta ah kaas oo u qaabeysan heer gobol, heer degmo, iyo heer goob codbixineed.
2. Diwaanka Codbixiyaha ee kama danbeysta ah waxa la soo saari doonaa lix bilood ka hor doorashada.
 3. Diiwaanka Codbixiyahu waxa uu noqon doonaa xog lagu keydiyo qalabka Kombiyutarka iyo diiwaano kaas oo koobsanaya dhamaan xogaha laga qoro muwaadinka marka loo diiwaangelinayo codbixiye ahaan.
 4. Diiwaanka codbixiyayaashu waa hanti qaran, waxaana ka masuula xafidaadiisa, ilaalintiisa Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
 5. Waxa reeban in xogta iyo macluumaadka ku jira diiwaanka codbixiyayaasha dalka laga saaro.

Qodobka 68^{aad}: Qaybinta Kaadhka Codbixinta

1. Qof kasta oo ku jira diiwaanka codbixiyayaasha ee kama danbeysta ahi waxa uu xaq u leeyahay in la siiyo kaadhka codbixinta, kadib marka uu la yimaado cadayntais-diiwaangelinta codbixiyaha. Kaadhka codbixinta waxa ku qornaan doona macluumaadkan soo socda:
 - a. Magaca oo afraan iskuna sar go'an kuna qoran far isku mid ah;
 - b. Sawirka codbixiyaha.
 - c. Lambarka Warqadda Aqoonsiga.
 - d. Lambarka tixraaca diiwaan-gelinta codbixiyaha.
 - e. Sanadka uu dhashay.
 - f. Jinsiga (lab ama dhedig).
 - g. Goobta doorashadda uu codbixiyuhu ka dhiibanayo codkiisa.
6. Qof kasta oo ay ka xumaatay ama lumay cadaynta is-diiwaangelinta codbixiyuhu (certificate of registration) waxa uu Komishanka ka cadsan karaa in la siiyo Kaadhka Codbixinta ka dib marka laga hubiyo Liistada Diiwaanka Codbixiyayaasha xogtiisanala xaqijiyo.
7. Nuqulada ka mid ah diwaanka codbixiyayaasha waxa la siin doonaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Axsaabta Qaranka.

8. Gobol kastaa waxa la siin doonaa nuqulo ku saabsan diwaanka codbixiyayaasha ee gobolkaasi oo u kala qaybsan degmooyinka, deegaannada iyo goobaha diiwaangelinta codbixiyayaasha.

Qodobka 69aad: Lumista Kaadhka Codbixinta

1. Qof kasta oo uu ka lumo Kaadhka Codbixintu, waa inuu muddo aan ka badneyn laba todobaad ku wargeliyaa saldhiga booliska ee ugu dhaw, isagoo cadaynaya sababta lumista.
2. Marka uu boolisku ku qanco asbaabaha lumista waxaa uu siinayaa codsadaha warqad cadayn ah taas oo codsaduhu uu la-tagaayo xafiiska Komishanka ama wakiilada heer degmo ama gobol.
3. Xafiiska Komishanku ama wakiilkha heer dagmo ama gobol marka uu helo warqada cadaynta ee booliska waxaa uu ka dalbanayaa Komishanka in ay u diyaarinayaan codsadaha kaadhka codbixinta muddo aan ka badnayn bil gudaheed, oo leh tixraaca kii hore ee lumay.
4. Qof ka uu ka xumaado kaadhka Diwaangelintu waa in uu la yimaadaa kaadhkii xumaaday, oo ay ku lifaaqan tahay arji codsi ah oo ay ku cadahay sababta keentay kaadhka xumaaday, xarunta gobolka/degmada ee Komishanka taas oo marka ay ku qanacdo sababta keentey kaadhka xumaaday usoo gudbin doona Xarrunta Komishanka si Kaadh badal loogu diyaariyo.
5. Qof kasta oo loo badalayo kaadhka codbixinta waa in marka hore la hubiyaa xogtiisa gaar ahaaneed lagana qaadaa astaamaha indhaha.
6. Iyada oon lagu xadgudbeyn farqadaha sare ku xusan, qof kasta oo uu kaadha codbixintu ka lumo ama xumaado muddada u dhaxaysa doorashooyinka 2017 iyo waqtiga diiwaangelinta xaq uma laha in loo badalo ama loo sameeyo kaadh cusub.
7. Ugu yaraan lix bilood ka hor doorashado kasta Komishanku waxa uu baahin doonaa waqtiga la ogolyahay in ay isku diiwaangeliyaan muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha Xeerku dhigayo een

diiwaangashaneyn iyo kuwa raba in loo badalo ama loo soo saaro kaadhkii hore oo ka lumay.

8. Komishanku waa in uu si mudaale ah u baahiyaa waqtiyadda la sameynayo kaadh badalka ee gobolada dalka JSL.

**Qodobka 70^{aad}: Wax-ka-bedelka Diiwaanka
Codbixiyayaasha ee Rasmiga ah**

1. Doorasho kasta lix bilood ka hor, Komishanka Doorashooyinku waxa uu wax-ka-bedel ku samayn karaa Diwaanka codbixiyayaasha ee kama danbeysta ah.
2. Wixa Diwaanka lagu dari doonaa muwaadiniinta buuxiyey shuruudaha diiwaangelinta ee aan ku jirin diiwaankii hore, waxa kale oo laga saari doonaa qof kasta oo geeriyyoday mudada u dhaxeysa diiwaangelinta hore iyo wakhtiga ta danbe.
3. Muwaadiniinta doonaya in ay wax ka bedelaan xogtooda shakhsiga ahaaneed, sida (magaca qofka, sawirka qofka, goobta codaynta) waxa fursad loo siin doonaa in ay wax-ka-bedelkaasi samayn karaan muddada doorashada ka horeysa, iyaga oo saxeexaya foomka wax-ka-bedelka xogta qofka oo uu Komishanku siin doono.
4. Inta aan wax-ka-bedel lagu samayn xogta shakhsiga ah, waa in marka hore la xaqijiyyaa astaamaah indhaha ee qofka, lana hubiyaa xogtiisa gaarka ah.
5. Farqadaha Qodobkani ee 1^{aad}, 2^{aad}, 3^{aad}, 4^{aad}, ma khuseeyaan doorashooyinka qorshaysan 2017ka.
6. Liistada diwaanka codbixiyayaasha ee kama danbeysta ah muwaadiniinta ku jira oo kaliya ayaa xaq u leh in ay wax doortaan lana doorto.

**Cutubka Todobaad: Qodobo Kala Duduwan
Qaybta Koowaad:**

Qodobka 71^{aad}: Reebanaanta Hal Kaadh Wax ka Badan

1. Waxaa ka reeban muwadin kasta inuu qaato hal kaadh waxa kabadan ama been ka sheego xogta lagu qoraayo waraaqaha diiwaangelinta, haddii uu muwaadin qaato hal kaadh wax ka badan ama uu been ka sheego xogta lagu

qoraayo waraaqaha diiwaangelinta waxaa lagu cizaabayaa cizaabaha ku qoran Qodobka 44^{aad} ee Xeerka.

2. Hawl-wadeen kasta oo ka tirsan Komishanka oo bixiya hal kaadh wax ka badan ama been ka sheega dokumentiga diiwaangelinta ama qof kale u fududeeya muu been ka sheego xogta lagu qorayo waraaqaha diiwaangelinta waxa uu mutaysanayaa cizaabaha ku xusan Qodobka 44^{aad} ee Xeerka.
3. Qof kasta oo lagu helo in uu hal mar wax ka badan is-diiwaangeliyay waxa uu waayi doonaa xaqa codaynta, ilaa diiwaangelin danbe laga samaynayo.

Qodobka 72^{aad}: Xogta Khaldanta

Haddii xog khaldani ku jirto diiwaanka codbixiyayaasha ee kama danbeysta ah, wax saameyn ah ku yeelan mayso dhagangalka diiwaanka intiisa kale, Komishanku waxa uu soo saari karaa amarro lagu saxayo xogta khaldantey inta aan la gaadhin doorashadda mustaqbal.

Qodobka 73^{aad}: Wax-ka-bedel

Xeer-nidaamiyahani waxa wax ka bedel, iyo kaabis ku sameyn kara xubnaha Komishanka Doorashoooyinka Qaranka.

Qodobka 74^{aad}: Dhaqangal

1. Xeer-nidaamiyahani waxa uu dhaqangeli doonaa marka ay saxeexaan xubnaha Komishanka Doorashoooyinka Qaranku, isla markaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah.
2. Komishanka Doorashoooyinku waxa uu soo saari doonaa wareegtooyin, go'aano, hagayaal, iyo habraacyo lagu hirgalinayo Xeer-nidaamiyahani iyo Xeerkaba.



XEERKA HAB-DHAQANKA Axsaabta Qaranka EE DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

Ref: KDQ/XK/501/16

Taar: 07/01/2016

AARAAR:

Axsaabta Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland:

- *Iyagoo* ogsoon muhiimadda Diwaangelinta codbixiyayaashu ay u leedahay geedi-socodka dimuquraadiyadda dalka Jamhuuriyada Somaliland;
- *Iyagoo* garawsan in diiwaangelinta codbixiyayaashu ay laf dhabar u tahay doorasho xor iyo xalaal ah;
- *Iyagoo* garawsan in Komishanka Doorashooyinka Qaranka, Hay'adaha Cadaaladda iyo Warbaahintu ay u madaxbannaan yihiin hawlahooda isla markaana ay ka madaxbannaan yihiin Axsaabta Qaranka;
- *Iyagoo* ogsoon in meel looga soo wada jeedo danta iyo maslaxadda guud ee dalkan Jamhuuriyadda Somaliland, isla markaana sida Dastuurka iyo Shuruucda Doorashooyinku ay jideeyeen si nabad-gelyo ah ugu loollamaya hoggaanka siyaasadeed ee dalka;



Waxa ay ku heshiiyeyn in ay u hogaansamaan Xeerkan
Hab-dhaqan (Code of Conduct for Political Parties) kaas
oo ay Axsaabta Qaranku si wada jir ah isula oggolaadeen
iyadoo ay Axsaabta Qaranka iyo Komishanka
Doorashooyinka Qaranku (KDQ) wada saxeexeen maanta
oo ay taariikhdu tahay 07 Janaury 2015.

QODOBKA 1^{aad}: MAGACA XEERKA

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa “**Xeerka Hab-dhaqanka Axsaabta Qaranka ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha**”.

QODOBKA 2^{aad}: MACNAHA ERAY-BIXINTA

- 1) **“Komishan”**: Waxaa loola jeedaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
- 2) **“Xisbiyadda”**: Waxaa loola jeedaa sadexda xisbi qaran.
- 3) **“Diiwaangelin”** waxa loola jeedaa Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.
- 4) **“Mas’uul Xisbi”**: Waxaa loola jeedaa mas’uuliyinta kala duwan ee Xisbiyadda Siyaasadda.
- 5) **“Guddida Farsammo”** Waxa loola jeedaa Guddida farsammo ee lagu aasaasay Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.
- 6) **“Wakiil Xisbi”** Waxa loola jeedaa xubinta uu xisbi usoo magacaabo goobaha diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

- 7) “**Xubin Xisbi**” waxa loola jeedaa xubnaha u diiwaangashan Axsaabta Qaranka.



QODOBKA 3aad: DABBAQAADDA XEERKA

XEERKAN HAB-DHAQAN WAXAA LAGU DABBHQAYAA, KUNA DHQMAAYA DHAMMAAN HOGGAAMIYEYAASHA AXSAABTA QARANKA, MAS’UULIYIINTA AXSAABTA QARANKA, MAS’UULIYIINTA DAWLADDA EE LEH MAGACAABISTA SIYAASADEED, XUBNAHA AXSAABTA QARANKA, IYO TAAGEERAYAASHA LAGU YAQAAN IN AY XISBI U OLOLEEEYAAN.


QODOBKA 4aad: MABAADII’DA GUUD

SHARCINIMADDAA (legitimacy) DIIWAANGELIN CODBIXIYE OO SAX AHI OO KU SALAYSAN XOG SAX AHI WAXA AY KU IMAN KARTAA:

- 1) MARKA IS-DIIWAANGELIYAYAASHA LAGU WAR-GELIYO, LAGUNA WACYI-GELIYO QAABKA LA ISKU DIIWAANGELINAAYO IYADOO TAAS LOO MARAAYO OLOLE WACYI GELINEED OO TAABO GAL AH;
- 2) MARKA AY IS-DIIWAANGELIYAYAASHU ISKU DIIWAANGELIYAAN IYAGA OO AAN KU CELCELINAYN;
- 3) MARKA AY AXSAABTA QARANKA IYO HOGGAAMIYEYAASHOODU SI NIYAD-SAMI AH (good faith) UGU DHQMAAN UNA IXTIRAAMAAN XEERKA HAB-DHAQANKA AXSAABTA QARANKA EE DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA, XEERKA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA, XEER-NIDAAMIYAHAA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA, XEERARKA DOORASHOOYINKA, XEERKA NIDAAMKA AXSAABTA/URURRADA SIYAASADDA IYO DASTUURKA;
- 4) DIIWAAN GELIN SAX AHI WAA XOGTA UGU SAXSAN EE LAGU GELI KARO DOORASHO XOR IYO XALAAL AH.

QODOBKA 5aad: UJEEDDADA XEERKA HAB-DHAQANKA

- 1) UJEEDADA XEERKAN HAB-DHAQANKA AXSAABTA QARANKU WAA IN KOR LOO QAADO WAXYAALAHAA SUURTO GELIN KARA INAY DHACDO DIIWAANGELIN SAX AH OO AAN KHALAD LAHAYN.
- 2) IN LAGA HORTAGO IN MUWAADINIINTU AY ISKU DAYAAN IN AY IS-DIIWAANGELIYAAN WAX KA BADAN HAL MAR.

- 
- 3) In Axsaabta Qaranku la socon karaan una kuurgali karaan habsami u socodka diiwaangelinta, iyaga oo ka dheeraanaya wax kasta oo khalkhaal galin kara habsami u socodka diiwaangelinta saamayna ku yeelan kara natijada kasoo bixi doonta diiwaangelinta.
 - 4) In sida ugu haboon wax looga qabto cabashooyinka iyo khilaafaadka ka yimaada dhaqangelinta diiwaangelinta codbixiyayaasha loona helo xal lagu saxayo cabashooyinka ka yimaadda Axsaabta Qaranka.

QODOBKA 6^{aad}: KU DHAQANKA XEERKA

Axsaabta Qaranku iyaga oo fulinaaya Xeerkana Hab-dhaqanka waa:

- 1) Inuu Xisbi kastaa muujiyo inuu u hoggaansan yahay ku dhaqanka Xeerkana;
- 2) Inay ku wacyigeliyaan, Wakiillada Xisbiyada, xubnaha xisbiga iyo madaxdaba in ay ku dhaqmaan isla markaana ixtiraamaan meel-marinta iyo ku dhaqanka Xeerkana;
- 3) Inay adkeeyaan joogteeyaanna wada shaqaynta ka dhaxaysa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
- 4) Inuu qaado tallaabo kasta oo suurtogal ah inaan la dhiirri-gelin wax kasta oo jabinaaya ama carqaladaynaaya Xeerkana;
- 5) In uu cambaareeyo fal kasta oo minjo xaabin kara qabashada diiwaangelin sax ah oo xalaal ah.
- 6) Inuu ballan qaado inuu aqbalayo natijada ka soo baxda diiwaangelinta codbixiyayaasha ama ka keeno cabasho muddo 7 casho gudaheed ah, haddii uu ku qanci waayo liiska kama dambaysta ah ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.

QODOBKA 7^{aad}: WAXYAABAHKA REEBBAN XISBIYADA WAKHTIGA DIIWAANGELINTA

Xisbi kasta waxaa ka reebban:

- 1) Inuu ku kaco hawlo wiiqi kara ama waxyeello u gaysan kara nabadgelyada iyo deggenaanshaha dalka ka hor diiwaangelinta, diiwaangelinta dhexdeeda, ama diiwaangelinta ka dib.
- 2) In uu ku dhiiri-geliyo xubnaha xisbiga ama taageerayaashiisa in ay hal mar wax ka badan is-diiwaangeliyaan.
- 3) In uu u fududeeyo xubnaha xisbigiisa ama taageerayaashiisa in ay qaataan hal kaadh wax ka badan.
- 4) Inuu adeegsado hadallo aflagaado ah ama meel ka dhac ah oo sababi kara rabshado gacan-ka-hadal ah wakhtiga diiwaangelintu socoto.
- 5) Inuu baqo-geliyo is-diiwaangeliyaha, wakiillada xisbiyadda, shaqaalaha Komishanka.
- 6) Inuu arbusho ama khalkhal gelijo diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- 7) Inuu is-hortaago qaybinta qoraalada, ama muujinta hal-ku-dhegyo loogu talo galay wacyigelinta diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- 8) Inuu jeex-jeexo, baabi'yo ama ku kaco fal kasta oo wax u dhimaaya gudbinta farriinta ay xambaarsan yihii qoraalladda, calaamadaha, iyo boodhadhka diiwaangelintu;
- 9) Inuu u diido qofnaba, inuu ka qayb galo diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- 10) Inuu u oggolaado taageerayaasha Xisbigiisa inay ku kacaan wax kasta oo diiwaangelinta dhaawacaaya.
- 11) Inuu sameeyo oole ama bannaan-baxyo siyaasadeed oo uu kaga soo hor jeedo diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- 12) Inuu xoog ku qabsado goob diiwaangelineed ama u adeegsado qaabab sharci darro ah goob diiwaangelineed ama agabka iyo qalabka diiwaangelinta.

**QODOBKA 8aad: REEBBANAANTA ISTICMAALKA IYO
HAYSASHADA NOOCYADA HUBKA**

Xubnaha Axsaabta Qaranka, Wakiillada Axsaabta iyo taageerayaashoodaba waxaa ka reebban kana mamnuuc

ah in ay noocyada hubka kala duwan u soo qaataan goobaha ay ka socoto diiwaangelinta codbixiyayaashu.

QODOBKA 9aad: GEEDDI-socodka DIIWAANGELINTA




A. Komishanka waxaa ku Waajib ah:-

- 1) In ay u gutaan waajibkooda si dhexdhexaadnimo ah oo hufan.
- 2) Komishanku waa in uu raacaa Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha (Xeer Lr. 37/2007) ee wax-ka-bedelka iyo kaabista lagu sameeyay 2014, Xeer Nidaamiyaha iyo Xeerkana Hab-dhaqan.
- 3) Komishanku waa in uu warbixin ka siyaa Axsaabta Qaranka geedi-socodka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.
- 4) Komishanku waa in uu dadweynaha ku wacyi-geliyaa muhiimadda ay leedahay diiwaangelinta Codbixiyayaashu.

B. Xisbi kasta waxaa ku waajib ah:-

- 1) In uu ku dhaqmo Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka ee dhaqangalka ah, iyo Xeerkana Hab-dhaqankaba.
- 2) Inuu wada shaqayn la yeesho masuuliyiinta diiwaangelinta si loo xaqijiyo in diiwaangelintu u dhacdo si nabadgelyo iyo habsami ah kuna dhammaato si fiican.
- 3) In uu ilaaliyo nabadgelyada hawl-wadeennadda diiwaangelinta iyo masuuliyiinta Komishanka Doorashooyinka Qaranka xilliga diiwaangelinta.
- 4) In ay gacan ka siyyaan hay'adaha nabadgelyadu in ay ka hor tagaan fal-damibiyeed kasta oo suurto-gal ah in uu dhaco xilliga diiwaangelinta kaasoo ku saabsan hawlahaa diiwaangelinta (Registration Offences).
- 5) Inuu qaato tilmaan kasta oo sharci ah una hoggaansammo awaamiirta Komishanka Doorashooyinka Qaranka.



- 6) Inuu la sameeyo xidhiidh wanaagsan oo joogto ah Komishanka Doorashooyinka Qaranka, masuuliyiinta iyo hawl-wadeenadda Komishanka Doorashooyinka iyo Xisbiyada kale.
- 7) Inuu ka qayb qaato sugidda nabadgalyadda iyo badbaadada masuuliyiinta diiwaangelinta ka-hor diiwaan gelinta, diiwaangelinta dhexdeeda iyo ka-dib diiwaangelinta.
- 8) Inaanu si sharci darro ah u farogelin shaqada hawl-wadeenadda diiwaangelinta.
- 9) Inuu qaddariyo lana shaqeeyo goob joogayaasha (**observers**) iyo Guddida Farsammo ee diiwaangelinta.

QODOBKA 10^{aad}: ADEEGSIGA SAXAAFADDA

- 1) Axsaabta Qaranku waa in ay ka fogadaan baahinta wax kasta oo wax u dhimmi kara geedi-socodka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha iyo nabadgelyadda Guud ee dalka JSL.
- 2) Xisbi kastaa waa in uu ixtiraamaa Xeerarka Dalka ee khuseeya madaxbanaanida saxaafadda, kana dheeraado in uu aflagaado iyo cay u mariyo xisbiyadda kale ama Komishankaba.
- 3) Axsaabta Qaranku waa in aanay marin habaabin ujeedooyinka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, kuna dhiirigeliyaan in ay bulshadu is-diiwaangeliso.
- 4) Axsaabta Qaranku waa in ay bulshada uga digaan in hal mar wax ka badan ay is-diiwaangeliyaan.

GUDDIDA FARSAMMO (TECHNICAL COMMITTEE)

QODOBKA 11^{aad}: AASAASID

- 1) Iyadda oo la raacayo Xeerka Diiwaangelinta iyo Xeernidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha waxa la aasaasi doonaa Guddida Farsammo ee Hawlaha Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.
- 2) Xubnaha Guddidu waxa ay ka koobnaan doonaan:



- a) Laba xubnood oo Komishanka Doorashooyinka Heer Qaran ah;
 - b) Laba xubnood oo ka socda Wasaaradda Arrimaha Gudaha;
 - c) Saddex Xubnood oo ka kala socda Axsaabta Qaranka.
- 3) Guddida Farsammo waxaa la hawl-gelinayaan isla marka la ansixiyo Xeer nidaamiyaha waxaanay shaqadoodu dhammaanaysaa marka hawsha diiwaangelinta la dhammays tiro, lana soo saaro liiska ugu danbeeya. Hase yeesh ee mar kasta oo ay Diiwaangelini jirto Guddida dib ayaa loo abuurayaa.
- 4) Guddida waxaa Guddoomiye iyo Ku-xigeen u ah labada Xubnood ee ka socda Komishanka Doorashooyinka.

QODOBKA 12^{AAD}: UJEEDDADA GUDDIGA FAR SAMMO EE HAWLAHA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

1. Ujeeddada Guddida Farsammo waa:
 - a) In ay Komishanka ka caawiyaan habسامي u socodka hawlaha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
 - b) In ay ka talo bixiyaan dhaqangelinta diiwaangelinta codbixiyayaasha.

QODOBKA 13^{AAD}: XILKA IYO WAAJIBAADKA GUDDIGA FAR SAMMO EE HAWLAHA DIIWAANGELINTA CODBIXIYAYAASHA

Xilka iyo Waajibaadka Guddidu waa:

- 1) In ay Komishanka kala taliyaan farsammo ahaan qaabka loo hirgalinayo diiwaangelinta codbixiyayaasha.
- 2) In ay kala qayb-galaan kana taageeraan wixii hawl ah ee Komishanku uga baahdo.

- 
- 3) Ka talo bixinta caqabadaha farsammo ee laga yaabo in ay soo food saarto hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
 - 4) In ay xidhiidhiyaan xafiisyadda ay matalaan iyo Komishanka;
 - 5) In ay la socod siiyaan xafiisyadda ay matalaan geedi-socodka hawsha diiwaangelinta codbixiyayaasha.
 - 6) In ay la socdaan nidaamka diiwaangelinta codbixiyayaashu uga socoto gobolada iyo degmooyinka dalka JSL, wixii tallo iyo tusaale ahna u gudbiyaan Komishanka.
 - 7) Haddii Komishanku uga baahdo, in ay kala qaybgalaan wacyigelinta gobolada iyo degmooyinka si loogu baraarujyo bulshada muhiimadda ay leedahay diiwaangelinta codbixiyayaashu.

QODOBKA 14^{aad}: WAKIILADA XISBIYADA

1. Saddexda xisbi qaran waxa ay u soo diran karaan goob kasta oo diiwaangelin ka dhacayso min hal wakiil. Waxa kale oo ay keeni karaan bedelkooda haddii ay maqnaadaan.
2. Wakiillada ay axsaabtu soo dirsadaan waa inay ku sugnaadaan goobahooda xilliyyada hawsha diiwaangelintu socoto, soona jeediyaa wixii tabasho ama cabasho ah ee ay qabaan haddii ay jirto.
3. Wakiil kasta oo xisbi waa in uu ku dhaqmaa Xeerka Anshaxa Axsaabta Qaranka ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, iyo shuruucda diiwaangelinta ee dhaqan galka ah.

Qodobka 15^{AAD}: Waajibaadka iyo Masuuliyadda

Wakiillada Axsaabta Qaranka

1. Wakiillada axsaabtu waxa ay hubinayaan in geedi-socodka diiwaangelintu waafaqsanyahay sharciga, waxana ay u kuurgali doonaan hawsha diiwaangelinta ee ay wadaan hawladeenadda diwaangelintu ee goobta uu ka hawlgalayo/so.

2. Wakiillada axsaabtu ma faro-gelin karaan mana carqaladayn karaan hawsha diiwangelinta ee socota;
3. Wakiillada axsaabtu waxa ay buuxin karaan foomamka cabashada haddii ay cabasho ka qabaan geedi-socodka diwaangelinta codbixiyayaasha goobta.
4. Wakiillada axsaabtu ma soo bandhigi karaan qoraal, calaamad, kaadh, ama qaab kale oo muujinaya in ay wakiillo ka yihii xisbi gaar ah, kamana dhaxxoleyn karaan goobta diwaangelinta iyo agagaarkeedaba.

**QODOBKA 16^{aad}: GUDDIDA ILAALINTA IYO HABSAMI-U-SOCODKA Diiwaangelinta CODBIXIYAYAASHA
(Monitoring Board)**

1. Ujeeddada loo Aasaasay Guddida:

A. Guddida Ilalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta waxa loo aasaasay kor-u-qaadista suurto-galmimada in ay diiwaangelin sax ahi dalka ka qabsoonto, iyo in ay diiwaangelintaasi ku qabsoonto kuna gebo-gebawdo turxaan la'aan, si waafaqsan Sharciga iyo Xeerarka dalka.

2. Xilka Guddida Guddidu waxay u xilsaaran tahay:

- a. Ilalinta Habsami-ugu-dhaqanka wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka iyo Xeerka Hab-Dhaqanka Axsaabta Qaranka ee Diiwaangelinta Codbixiyayaasha.
- b. Xallinta khilaafaadka iyo murannada ka dhaxxhasha xisbiyada dhaxdooda.


- c. Soo-saarista warbixino ku saabsan sida dhinacyadu ugu dhaqmayaan Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka, Xeerka Hab-Dhaqanka Axsaabta Qaranka iyo guud ahaanba Geeddi-socodka Diiwaangelinta.

3. Awoodda Guiddida: Guiddidu waxay awood u leedahay:-

- a. Xallinta khilaaf kasta oo ka dhex-dhasha dhinacyada Xeerkan Hab-Dhaqan kala saxeexday;
- b. Hubinta meel-marinta Xeerka Hab-Dhaqanka Axsaabta Qaranka;
- c. Ka qaadista tallaabo anshax-marineed oo Xeerka Hab-dhaqan waafaqsan xad-gudub kasta oo Guiddida ama wakiilladeedu ogaadeen dhicitaankiisa;
- d. Tallaabada anshax-marineed ee ay Guiddidu soo saartaa ama qaaddaa wuxuu noqonayaa mid qaadashadiisu waajib ku tahay dhinacyada uu khuseeyo, si waafaqsan Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka doorashooyinka iyo Xeerka Habdhaqanka Xisbiyada (Code of Conduct).

4. Tirada Xubnaha Guiddida iyo Qaabka Soo-Xulisteeda:

- a. Guiddidu waxay ka kooban tahay Toddoba aqoonyahan oo reer Somaliland.

- 
- b. Guddidu waxa ay iska dhex doorayaan Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen iyo Xog-haye.
 - c. Guiddida waxaa soo xulaaya ista markaana magacaabaaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
 - d. Guddidu waxay lixda gobol-doorasho ee dalka ku yeelanaysaa min laba wakiil oo KDQ uu soo xulo. Iyagoo Guddidu u igmannaaya in ay waajibaadkooda ka fuliyaan Gobollada.

5. *Shuruudaha Lagu Soo Xulayo Xubinta Guiddida*

- 1. xubinta Guiddida ahi waa in ay buuxiso shuruudahan hoos ku qoran:
 - a. In uu yahay/tahay qof sumcad wanaagsan ku leh bulshada.
 - b. Qof leh Go'aan qaadasho, karti, aqoon iyo waayo-aragnimo uu ku gudan karo mas'uuliyadda culus ee la saaray,
 - c. Ku sifoobay dhexdhedaadnimo siyaasadeed.
- d. In uu leeyahay/leedahay xirfad uu ku qoro warbixin (report writing skills).

2. *Muddada Xilka ee Guiddida:*

- a. Guddidu heer qaran muddo xileedkeedu waa lix bilood oo laga bilaabo maalinta ay saxeexaan heshiiska,
- b. Gobolada xubnaha uga wakiil ka ah Guddidu waxa ay muddo xileedkoodu ku eyyahay laba bilood oo ka bilaabmata maalinta heshiiska ay saxeexaan.

3. Wadashaqeynta Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyo Guddida :



- a. Guddida Illaalinta Habsami-u-socodka Diiwaangelinta way u madaxbaanaaneysaa hawlahooda shaqo, iyagoo marwalba la-tashni la yeelanaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka.
- b. Wixii tallaabo anshax marineed ah ee ay Guddidu soo jeediso waxay u gudbineynsaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka si loo fuliyo.
- c. Axsaabta Qaranku waa in ay wada shaqayn iyo gacanba siiyaan Guddida Illaalinta Habsami-u-socodka Diiwaangelinta. Waana in ay ku taageeraan shaqadooda.

QODOBKA 17^{aad}: XALLINTA KHILAFAADKA (CONFLICT RESOLUTION)

- 1) Axsaabta Qaranku waxa ay muran iyo khilaaf kasta oo khuseeya diiwaangelinta codbixiyayaasha oo dhexyimaada waxa ay ku xalin doonaan wada-hadal iyo is-afgararad.
- 2) Haddii ay Axsaabtu ku guulaysan waayaan in ay khilaafaadka khuseeya diiwaangelinta ee dhexdooda ah xalliyaan waxay u soo ban-dhigayaan Guddida Illaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta.
- 3) Haddii arrintu ay tahay mid aanay waxba ka qaban karayn Guddidaasi waxaa loo soo gudbinayaan Komishanka Doorashooyinka Qaranka.


QODOBKA 18^{aad}: CABASHOOYINKA

- 1) Xisbi kastaa waxa uu Cabasho u soo gudbin karaa Guddida Illaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta haddii uu u arko in lagu xad-gudbay Xeerka Diiwaangelinta, Xeer Nidaamiyaha iyo Xeerkana Hab-dhaqan.
- 2) Iyadoo lagu xisaabtamayo wakhtiga, Cabashooyinka la soo gudbiyo waa in si dhakhso ah baadhis loogu sameeyo go'aanna laga gaadho;

QODOBKA 19^{aad}: CABASHOOYINKA BEEN-ABUURKA

AH

Axsaabta Qaranku waa in aanay ku xad-gudbin xuquuqda soo gudbinta cabashooyinka. Waa in aanay samaynin cabasho been-abuur ah oo lagu jahawareerinaayo geeddi-socodka diiwaangelinta.




QODOBKA 20^{aad}: Tallaabooyinka laga qaadayo cidda XEEERkan JEBISA

Xisbi kasta ama hawl-wadeen Xisbi, xubin Xisbi iyo taageere Xisbi ee ku xadgudba Xeerkan, Guddida Ilaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta waxay ka qaadanaysaa go'aamo anshaxmarineed sida:

- 1) Digniin caadiya;
- 2) Digniin qoraal ah;
- 3) Haddii xadgudubyada dhacay ay noqdaan kuwo ka culus awooddha Guddida Ilaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta ama xad-gudubyada dhacay ay yihiin kuwo dambi ciqaabeed ka dhalan karo, waxaa Guddida Ilaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta u gudbinayaa Komishanka Doorashooyinka Qaranka;
- 4) Wixii khilaaf ah ama farsamo ah ee xallintooda laga waayo Dastuurka Qaranka, Xeerka Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeer-nidaamiyaha Dhaqangelinta Diiwaangelinta Codbixiyayaasha, Xeerarka Doorashooyinka iyo Xeerka Hab-dhaqanka Xisbiyada waxa xal ka gaadhaya Komishanka Doorashooyinka Qaranka iyaga oo la tashanaya Guddida Ilaalinta Habsami-u-Socodka Diiwaangelinta.

QODOBKA 21^{aad}: KU DHAQANKA IYO WAX KA BEDDELKA XEERKAN

- 1) Xeerkan Hab-dhaqan nuxur ahaan wuxuu waafaqsan yahay shuruucda doorashooyinka ee dalka u yaalla sida: Dastuurka Qaranka iyo Xeerarka Doorashooyinka iyo Diiwaangelinta.
- 2) Xeerkan Hab-dhaqan waxaa lagu dabaqayaa xaalandaha aanay xeerarka dalka ee diiwaangelinta iyo doorashada khuseeyaa wax ka jidaynin.



- 3) Xeerkan waxaa lagaga dhaqmayaa xarunta dhexe ee diiwaangelinta ee KDQ, xarumaha diiwaangelinta gobollada iyo degmooyinka iyo goobaha diwaangelinta.
- 4) Xeerkan waxaa ku dhaqmaaya fulintiisana ilaalinaya Axsaabta Qaranka iyo KDQ.
- 5) Wax ka beddelka Xeerkani wuxuu ku iman karaa marka dhinacyada wada saxeexay ay ka wada tashadaan kana heshiyaan waxa lagu darayo iyo waxa laga saarayo.

QODOBKA 22aad: AWOODDA SAXEEXA

Xeerkan Hab-dhaqan waxaa Xisbiyada Qaranka u saxeexaya Guddoomiyeyaasha Axsaabta Qaranka.

*WAXAA LAGU SAXEEXAY HARGEYSA, MAANTA OO AH KHAMIIS
TODOBADA BISHA KOWAAD EE SANADKA LABADA KUN IYO LIX IYO
TOBANKA.*

XISBIGA KULMIYE:

Mudane: Muuse Biixi Cabdi

Guddoomiyaha Xisbiga KULMIYE

XISBIGA UCID:

Mudane: Eng. Faysal Cali Xusseen

Guddoomiyaha Xisbiga UCID

XISBIGA WADDANI:

Mudane: Cabdiraxmaan Maxamed Cabdillaahi (Cirro)

Guddoomiyaha Xisbiga WADDANI

KOMISHANKA DOORASHOOYINKA QARANKA:

Eng. Abdiqadir Iiman Warsame



Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka

QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

**JAMHUURIYADA
MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA**



SOMALILAND

Hargeisa District Court

هەلخەلە حەملە

MDH/J/DML/302/2014

10/12/2015

Ku:- Idaacadda Radio Hargeysa

Ku:- Dhamaan Warbaahinta Madaxa Banaan

Ku:- Maayirka Caasimadda Hargeysa

Ku:- Agaasimaha Waaxda Dhulka ee Dacwlada Hoose

Ku:- Taliyaha Saldhiga G/libaax Ee Hargeysa

Ku:- Maayirka Ku Xigeenka Caasimadda Hargeysa

Ku:- Xog hayaha Dawladda Hoose Hargeysa

Ku:- Xafiiska Nootayooyinka Hargeysa

Ku:- Garyaaanka Guud

**UJ:- Amar Xayiraad 4 Guri oo Dhaxal ah Ee ay lee
yihii ilma Axmed Cabdi kuna Yaala Degmada
G.libaax**



Maxkamadda Degmadda Hargeysa

Markay Aragtay:- Arjiga Codsiga ah Ee ay Maxkamadda u soo qorteen

1. Sucaad Axmed Cabdi
2. Hibaaq Axmed Cabdi
3. Yusra Axmed Cabdi

Kuna Codsanayaan in loo Xayiro guryahan Dhaxalka ah

Ee ay tagtay Aamina Geele Mire oo ku yaala Degmada G/libaax

Jihooyinkooduna goodna kala yihii

Bari.....Dhisme Galbeed.....Dhisme

Waqiiyi ...Waddo koonfur....Waddo

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Xayiraadan Qod: 294 295.296
XHM

Asbaabta Sare ku xusan iyo qodobada sharci Ee sare ku xusan Darteed waxay Maxkamdu laga bilaabo maanta oo taariikhdu tahay 13/01/2016 Xayiraad Saartay guryahan dhaxalka ah ku yaala Degmadda G/libaax ee ay leeyihiin ilma Axmed Cabdi kana tagtay Aamina Geele Mire in aan la iibin Karin la rahmi Karin la dhisi Karin sifo kalena loo badali Karin ilaa amar danbe maxkamadda ka soo baxayo

ALLAA

MAHAD

LEH



C/rashiid Maxamed Xirsi (Beer-geel)

Gudoomiyaha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye:- Khaalid Cabdi Muuse

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA

Hargeisa District Court

هەلەمەن دەقىل حەملە

MDH/J/DML/120/2016

24/01/2016

Ku:- Idaacada Radio Hargeysa

Ku:- Dhamaanba Warbaahinta Madax Banaan Ee Hargeysa

Ku:- Garyaqanka Guud Ee Qaranka

Ujeedo:- Baafin dacwaysane

1.C/qani Sayid C/raxmaan

Maxkamadda Degmada Hargeysa Waxay Baafinaysaa
dacwaysanaha Magaciisu kor ku Xusan yahay in uu
Maxkamadda horteeda ku yimaado (40) Cisho Gudahood oo ka
Bilaabmanta Marka laga baahiyio idaacada iyo Warbaahinta
Madax Banaan Ee Dalka.

dacwaysanahaasi oo Dacwad madani ahi u taalo Maxkamadda
Degmada Hargeysa

Haddii uu ku iman waayo Mudada Maxkamadu u qabatay
dacwaysanaha maxkamadu waxay dhagaysan doontaa
Dacwada isagoo Maqan sida waafaqsan Qod 204 X.H.M

Maxkamadu Waxay u Cuskatay Qodobka Sharci Ee 121 X.H.M.

ALLAA MAHAD LEH

C/wahab Maxamed Qalinle

Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeysa

Kaaliye:- Hibo jaamac Maxamed

JAMHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGAYSA

Hargeisa District Court

法庭

MDH/J/DML/02/2016

HARGEYSA: 26/01/2016

Ku:- Radio Hargeysa

Ku:- Garyaqaanka Guud Ee Qaranka

Ku:- Wargeys-Yada Madaxa Banaan

UJ:- Baafin Dacwaysane

(Maxamed Axmed Hawo)

Maxkamadda Degmada Hargeysa Waxay Baafinaysaa
Dacwaysanaha Magaciisu Sare Ku Xusan yahay inuu ku
Yimaado Mudo dhan (60) Cisho oo ka bilaabmata Marka laga
baahiyo Idaacada Radio Hargeysa iyo Wargeysyada Madaxa
Banaan. Ee dalka.

Waxa lagu Amrayaa Dacweysanaha in uu ku Yimaado Mudada
loo Qabtay. Hadaba hadii Dacwaysanuhu ku Iman Waayo
Mudada loo Qabtay Maxkamadu waxay ka qaadin doontaa

Talaabo Sharciga Waafaqsan sida waafaqsan qodobada 204
XHM.

(C/wahaab Maxamed Qalinle)

Garsooraha Maxkamada Degmada Hargeisa

Asli Maxamed Mire

Kaaliyaha Maxkamada Degmada Hargaisa



JAMHUURIYADA SOMALILAND
MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

MS/GWMS/G-17/2016

27/01/2016

Ku:- Gudoomiyeyaasha Gudiyada Dacwadaha Dhulka Gobolada JSL
Fadhiyadooda

Ku:- Dhammaan Garsoorayaasha Maxkamadda Sare JSL Hargaysa

Ku:- Garyaanka Guud ee Qaranka JSL Hargaysa

Og: Gudoomiyayaasha Golayaasha Deegaanada Fadhiyadooda

Og: Ururada Qareenada (SOLLA –SOWLA) JSL Hargaysa


Og: Xeer-Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL Hargaysa

Og: Xarunta Adeega Sharciga ee Jaamacada Hargaysa Hargaysa

Og: Xarunta Adeega Sharciga ee Jaamacada Camuud Boorame

**UJEEDO:- Wareegto Garsoor oo ku Saabsan
Dacwadaha Idaariga ah**

Gudoomiyaha Maxkamada Sare JSL:-



Markuu Arkay:-

In xeerka maamulka dhulka ee xeer 17/2001, uu dhagaysiga dacwadaha idaariga ah uu awood u siiyey gudiyada ka garnaqsita dacwadaha dhulka, go'aanada ay gudidaasi gaadhaana looga soo racfaan qaato maxkamada sare.

Markuu Arkay:-

In Maxkamada Sare ay dacwaha idaariga ah ay ku dhagaysato heerka darajada 2aad.

Markuu Arkay:-

In Dacwadaha idaariga ah ee racfaan ahaan ku soo gala maxkamada sare ay qaarkood u baahan yihiin in dib loo dhagayto, sababo la xidhiidha dhinaca cadaymaha oo aan dhamaystirnayn darteed ama iyada oo mararka qaarkood loo baahan karo in dhinac kale oo aan hore dacwada ugu jirin la soo dhex galiyo.

Markuu Arkay:-

In Dacwadaha Idaariga ahi u baahan yihiin in dhakhso go'aan kamadanbays ah looga gaadho. Hadii dib loogu celiyo gudidii hore uga garnaqdayna, ay taasi meesha ka saarayso ujeedadii laga lahaa ee dhakhsaha ah, keeni kartana daahid ama jiitan dacwadeed.

Markuu Arkay:-

Qodobada 344,259(4)XHM, iyo Asbaabta sare ku xusan darteed Gudoomiyaha Maxkamada Sare waxa uu soo saaray Wareegtadan Garsoor:-

1. Indacwadaha Idaariga ah ee Maxkamadda Sare ku soo gala Racfaan ahaan in Maxkamadda Sare ku dhagaysato heerka daraja 2aad sidoo kale qaban karto Caddaymo, dhagaysan karto markhaatiyaal, soo dhix galin karto dhinac kale.

- 
2. Inaan dib loogu celin gudiyada ka garnaqa dacwadaha dhulka ee Gobolada Dalka Dacwadaha dhulka ee ay hore u soo galeen.
 3. Maxkamadda Sare JSL waa inay, Go'aan Kama dambays ah ka gaaadhaa dacwadaha looga soo racfaan qaato, Go'aanada gudiyada ka garnaqa dacwadaha dhulka ee Gobolada dalka.
 4. Waxa la soo saaray wareegtedan maanta oo ay taariikhdu tahay 27/01/016.
 5. Waxay wareegtedani dhaqan galaysaa maalinta uu soo saxeexo Gudoomiyaha Maxkamada Sare JSL, isla markaana lagu faafiyo Faafinta Rasmiga ah

Aadan x. Cali Axmed

Gudoomiyaha Maxkamada sare JSL

Ahna Gudoomiyaha Gudida Cadaalada

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/01/2016.

03/01/2016

Har geysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran diiwan Gelinta Shirkadaha.



- Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo A wood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwaan geliso Shirkadaha.
- Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **GULF PHARMA LIMITED COMPANY LTD**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.
- Markuu Arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.
- Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, GULF PHARMA LIMITED COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Dawooyinka iyo qalabka Caafimaadka (Importer), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 03/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA



SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/02/2016.

03/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha. **(Sole Proprietorship)**

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **ISOM TRAVEL AND LOGISTIC**

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay” ISMO TRAVEL AND LOGISTIC, Astaanteeduna tahay:- (Goobo Magaca shirkadu ku dhix jirto) shaqadeeduna tahay Bixinta Adeegyadda Duulimaadka (Travel and Logistics), xarunteeduna tahay Magaaladda hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 03/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/03/2016.

03/01/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay
Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,
BUDUL CONSTRUCTION COMPANY.



Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan
yahay Xeerka Shirkadaha Xeer
N0.25/2004 Company Act of
Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu
saxeexay sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay BUDUL CONSTRUCTION
COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Dhisme),
shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega Dhismaha
(constriction), xarunteeduna tahay Magaaladda
Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
03/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Seer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD



Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin.

Xafiiska Xeer Ilalinta Guud ee Qaranka JSL, oo u xil saran Diiwan galinta_____

Markuu arkay:- Codsiga uu Mulkilaha dugsiga Noradiin, kuna codsanayo in loo diiwan galivo buugta daabacan ee dugsiga noradin.

Markuu arkay: - warqada Wasaaradda Waxbarashada iyo tacliinta sare ee ay kugu ogolaatay in loo ilaaaliyo daabacaada buugta (primary and secondary textbooks) ee dugsiga Noradin.

Markuu tixgalinay:- ahmiyada ay leedahay in la ilaaaliyo xaquuqda daabacaadeed (Copy Right).

Wuxuu Diiwan Geliyey.

Inay Xafiiska si sharci ah uga diiwan gashan yihiin buugagta (Primary and Secondary textbooks) uu leeyahay Dugsiga Noradin, buugtaas oo leh magaca iyo calaamada dugsiga Nuradin.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/05/2016.

06/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **KK TRADING COMPANY & CONSULTANCY LTD**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugar yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, KK TRADING COMPANY & CONSULTANCY, Astaanteeduna tahay:- (Cadceed ku dhex jirta Map-ka Africa), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta iyo dhoofinta Allaabooyinka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 06/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/06/2016.

10/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay
Diiwaan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,
FANOON STAR GENERAL
CONSTRUCTION COMPANY

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan
yahay Xeerka Shirkadaha Xeer
N0.25/2004 Company Act of
Somaliland.

Markuu arkay:- saxeexa saamilaha Shirkaddu uu
saxeexay sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay FANOON STAR GENERAL
CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-
(Dhisme Magaca Shirkadu ku dul wareegsan yahay)
shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega Dhismaha
(CONSTRUCTION), xarunteeduna tahay Magaaladda
Laascaanood, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu
tahay 10/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)


Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

JAMHURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/07/2016.

17/01/2016



Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkad aha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **WAAFI CONSTRUCTION & CONSULTING COMPANY LTD**, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay WAAFI CONSTRUCTION &CONSULTING COMPANY LTD, astaanteeduna tahay:- (Laba Qol oo Shub ah) shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/01/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer IlaaLiYaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/08/2016.

17/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.


Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerkha Shirkadda Magaceedu yahay, **CAYDIID CONSTRUCTION &**

CONTRACTING COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkadu, sida ku cad qodobka Ilaad (2) (a) Somaliland Company Law.



Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadoo duna ay sugar yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, CAYDIID CONSTRUCTION & CONTRACTING COMPANY LTD, Astaanteeduna tahay: - (laba bangalo oo ay ku hoos qoran yihiin Magaca Shirkadu) shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Heer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD



Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KOBCIYE CONSTRUCTION COMPANY

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay KOBCIYE CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay: (dhisme magaca shirkadu ku dhix qoran yahay) shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega Dhismaha (Construction), xarunteeduna

tahay Magaaladda Laascaanood, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/01/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/10/2016.

17/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkad aha.

Markuu arkay:- Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, LUSIDLE SHIPING LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer

N0.25/2004 Company Act of
Somaliland, saamiyadooduna ay
sugan yihiin.



Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay
saxeexeen sida uu qabo qodobka
11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay LUSIDLE SHIPING LTD,
Astaanteeduna tahay:- (Markab) shaqadeeduna tahay
(Shiping Agency) xarunteeduna tahay Magaaladda
Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay
17/01/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/11/2016.


17/01/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkad aha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadha Magaceedu yahay, COSOB CONSTRUCTION CO

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay COSOB CONSTRUCTION CO, Astaanteeduna tahay:-(Dhismayaal Kala Dambeeya Magaca Shirkaduna Ku dhex qoran yahay) shaqadeeduna tahay Bixinta Adeega dhismaha (Construction) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 17/01/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka